
# JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

WASAARADDA BOOSTADA, ISGAARSIINTA & TIKNOOLAJIYADDA




# SIYAASADDA & ISTIRAATIIJIYADDA SOOMAALIYA EE TIKNOOLAJIYADDA XOGTA IYO ISGAARSIINTA

2019-2024

# SHAQADA XIRFADAHA


| | | |
|---|---|---|
| **HORDHACA RA'IISUL WASAARAHA** | | **4** |
| **EREYGA WASIIRKA** | | **5** |
| **SIYAASADDA IYO ISTIRAATIIJIYADDA ICT** | | **7** |
| 1.1 | Hordhac | 7 |
| 1.2 | La jaanqaadista/waafaqsanaanta Siyaasadda ICT-ga ee Heshiisyada Heer Qaran, Gobol iyo Caalami | 9 |
| 2. | Hiraalka, Hiigsiga iyo Mabaadi'da Siyaasadda ICT-ga | 10 |
| 2.1 | Bayaannada Hiraalka iyo Hiigsiga | 10 |
| 2.2 | Mabaadi'da Aasaasiga ah | 10 |
| **3.0** | **XAALADDA IYO MUSTAQBALKA WAAXDA ICT-GA** | **11** |
| 3.1 | Is-gaarsiinta iyo Internetka | 11 |
| 3.1.1 | Xiriirka Maylka ugu Danbeeya | 11 |
| 3.1.2 | Kaabayaasha Laf-dhabarta Ah | 12 |
| 3.1.3 | Isku-xirka shirkadaha iyo Martigelinta Dalka Gudihiisa | 13 |
| 3.2 | Baahinta | 13 |
| 3.3 | Adeegga Boostada | 14 |
| 3.4 | Khayriyadaha/barnaamijyada Lacag-bixinta ee Elektrooniga ah | 14 |
| **4.0** | **UJEEDOOYINKA IYO ISTIRAATIIJIYADAHA SIYAASADDA** | **15** |
| 4.1. | Yoolasha Siyaasadda | 15 |
| 4.2. | Arrimah Mudnaanta Leh | 16 |
| 4.3 | Guudmarka Yoolasha Istiraatiijiga ah iyo Wakhtigooda | 17 |
| **5.0** | **QAABDHISMEEDYADA IYO MAS'UULIYAADKA HAY'ADEED** | **21** |
| 5.1 | Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta iyo Tiknoolajiyadda (MPTT) | 21 |
| 5.3 | Adeeg-bixiyayaasha Isgaarsiinta/Internetka ee Maxaliga ah | 22 |
| 5.4 | Baahiyayaasha | 22 |
| 5.5 | Wasaaradaha iyo Wakaaladaha kale ee Dowladda | 23 |
| 5.6 | Shirkadaha ICTga ee Waddaniga ah | 23 |
| 5.8 | Soo Koobista Qorshayaasha/habaynta Muhiimka ah ee Hay'adaha | 23 |
| **6.0.** | **DHINACYADA SIYAASADDU AWOODDA SAARAYSO** | **24** |
| 6.1 | Qaab-dhismeedyada Sharci iyo Nidaamin | 24 |
| 6.1.1 | Ujeeddooyinka Siyaasadda | 24 |
| 6.1.2 | Istiraatiijiyado | 24 |
| 6.2 | Kaabayaasha ICT-ga | 25 |
| 6.2.1 | Shabakadaha Lafdhabarta Caalamiga ah iyo Dalka | 25 |
| 6.2.2 | Xalalka Xiriirrada Maylka ugu danbeeya ee Sugan iyo kuwa gacanta | 26 |
| 6.2.3 | Maamulka Jeegaanta Raadiyaha | 26 |
| 6.2.4 | Fudaydinta Helidda Xaqqa Sii-Maridda. | 26 |
| 6.2.5 | Ka faa'idaysiga Kaabayaasha Aan Firfircoonayn | 26 |
| 6.2.6 | Wadaagista Taawarka iyo Goob-wadaaagga | 27 |
| 6.2.7 | Ammaanka iyo Ku-tiirsanaanta Kaabayaasha Muhiimka ah ee ICT-ga | 27 |
| 6.2.8 | Xarunta Xogta ee Dowladda | 27 |
| 6.2.9 | Kaabayasha Nidaamka Maaliyadeed | 28 |
| 6.2.10 | Istiraatiijiyadaha Taageeraya | 28 |

| | | |
|---|---|---|
| 6.3 | Helitaanka Dadka oo dhan ee Adeegyada Codka iyo Internetka qaadweynta | 28 |
| 6.3.1 | Hiigsiyada Awoodda Iibka | 29 |
| 6.3.2 | Siyaasadda Tartanka | 29 |
| 6.3.3 | Istiraatiijiyadaha | 29 |
| 6.4 | Ammaanka Xogta iyo Amniga Internetka | 29 |
| 6.4.1 | Ujeeddooyinka Siyaasadda | 30 |
| 6.4.2 | Istiraatiijiyado | 30 |
| 6.5 | Taageerista U-Sinnaanta Helitaanka/Galaangalka | 31 |
| 6.5.1 | Ujeeddooyinka Siyaasadda | 31 |
| 6.5.2 | Istiraatiijiyado | 32 |
| 6.6 | Horumarinta Khayraadka Dadka | 32 |
| 6.6.1 | Ujeeddooyinka Siyaasadda | 33 |
| 6.6.2 | Istiraatiijiyado | 33 |
| 6.7 | Hal-abuurka, Cilmi-baaristaiyo Horumarinta | 34 |
| 6.7.1 | Ujeeddooyinka Siyaasadda | 34 |
| 6.7.2 | Istiraatiijiyado | 35 |
| 6.8 | Ganacsiga Elektrooniga ah, Ilaalinta Xogta iyo Dhowrsanaanta | 35 |
| 6.8.1 | Ujeeddooyinka Siyaasadda | 35 |
| 6.8.2 | Istiraatiijiyado | 36 |
| 6.9 | Isbeddelka Digital-ka ee Dowladda | 36 |
| 6.9.1 | Ujeeddooyinka Siyaasadda | 36 |
| 6.9.2 | Istiraatiijiyadaha | 37 |
| 6.10 | Caafimaad Elektroonig ah (E-Health) | 37 |
| 6.10.1 | Ujeeddooyinka Siyaasadda | 37 |
| 6.10.2 | Istiraatiijiyado | 38 |
| 6.11 | Waxbarashada Elektroonigga ah | 38 |
| 6.11.1 | Ujeeddooyinka Siyaasadda | 38 |
| 6.11.2 | Istiraatiijiyado | 38 |
| 6.12 | Beeraha Elektroonigga ah | 39 |
| 6.12.1 | Ujeeddooyinka Siyaasadda | 39 |
| 6.12.2 | Istiraatiijiyado | 39 |
| 6.13 | Horumarinta Muxtawaha (content) Waddaniga ah | 39 |
| 6.13.1 | Ujeedooyinka Siyaasadda | 40 |
| 6.13.2 | Istiraatiijiyado | 40 |
| 6.14 | Maalgashiga iyo Maalgelinta | 40 |
| 6.14.1 | Ujeeddooyinka Siyaasadda | 40 |
| 6.14.2 | Soo-koobista Istiraatiijiyadaha | 40 |
| **7.** | **FULINTA SIYAASADDA & ABAABULKA KHAYRAADKA** | **41** |
| **8.** | **LIFAAQ** | **42** |

# HORDHACA RA'IISUL WASAARAHA

Ka dib sanado badan oo colaad ah, dalkeenu wuxuu diyaar u yahay inuu dib u qaabeeyo qeybaha kala duwan ee dhaqaalaha si loo gaaro horumar dhaqaale. Qeybaha aan u aragno inay dhaqaalaha kobciyaan waxaa ka mid ah Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada (ICT), taas oo kobac weyn sameysay labaatankii sano ee ugu dambeysay iyadoo ay jiraan caqabado badan. Kobacaas wuxuu ka muuqdaa heerka qaadashada taleefoonnada gacanta, lacagaha taleefoonka la isugu diro, internetka, iyo shirkadaha ku shaqeeya teknolojiyada oo sii badanaya, kuwaas oo si weyn gacan uga geysta dhaqaalaha dalkeena.

Diyaarinta Siyaasadda Qaran ee Isgaarsiinta & Teknolojiyada 2019-2024 waa tallaabo kale oo ay Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta & Teknolojiyadu u qaadday sidii aragti loogu sameyn lahaa ICT-da muddada shanta sano ee soo socota. Siyaasaddan waxaa looga gol leeyahay sidii iskaashi iyo wada-shaqeyn looga abuuri lahaa wasaaradaha iyo hay'adaha kale ee dawladda sababtoo dunida maanta ma jirto bulsho, dawlad ama dhaqaale dal leeyahay oo shaqeyn karaa isaga oo aan ka faa'iideysaneynin teknolojiyada. Sidaasi darteed, istaraatiijiyadani waxay noo noqon doontaa tii isku xiri lahayd dadaallada kala duwan ee ay wadaan dhammaan qeybaha kala duwan ee ay khuseyso.



*Md. Xasan Cali Kheyre*
*Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda*
*Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya*

Haddaba waxaan ugu baaqayaa wasaaradaha, hay'adaha kale ee dawladda, shirkadaha ganacsiga iyo hay'adaha nagala shaqeeyaha arrimaha horumarka inay gacan ka geystaan sidii loo fulin lahaa siyaasaddan iyo qorshaha la socda, isla markaana ay ka dhigaan hawlahooda ICT-da kuwa waafaqsan siyaasaddan. Iskaashi iyo wada-shaqeyn arrintan la xiriirta waxay muhiim u tahay sidii awooddeena iyo dhaqaalaheena aan isugu geyn lahayn arrintan, isla markaana looga fogaan lahaa in hal shey ay ka shaqeeyaan laba wasaaradood ama hay'ad oo aan is ogeyn.

Ugu dambeyntii waxaan u mahadcelinayaa Wasiirka, Wasiiru-dawlaha iyo Wasiir Ku-xigeenka iyo dhammaan shaqaalaha Wasaaradda shaqada wanaagsan ee qabtee tan iyo sanadkii 2017-kii. Xukuumaddeyda iyo shacabka Soomaaliyeed way ku faanayaan hawlihii aad qabateen.

**Md. Xasan Cali Kheyre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda**
**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**

# EREYGA WASIIRKA

Dunidu waxay garwaaqsatay in Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada (ICT) ay yihiin adeeg aan looga maarmin horumarka dhaqaale iyo kan bulsho ee ay ummadi leedahay. Inkastoo dalkeenu uu sanado badan ku jiray duruufo adag, haddana isgaarsiintu waxay ahayd meelaha kooban ee aan horumarka ka sameynay, waxaana ku faani karnaa inaan leenahay mid ka mid ah isgaarsiinta ugu jaban qaaradda Afrika. Sidaasi oo ay tahay, waxaa maqnaa kaalintii dawladda ee nidaaminta suuqa, sida in loo sameeyo sharci, xeer-nidaamiyeyaal iyo siyaasado kala duwan.

Laga soo billaabo sanadkii 2017-kii waxaan ka shaqeyneynay inaan buuxino kaalintii Dawladda ee ka maqneyd isgaarsiinta iyo teknolojiyada dalka, inagoo qaadnay tallaabooyin wax-ku-ool ah oo arrintaas wax looga qabanayo. Waxyaabaha aan ku guuleysanay waxaa ka mid ah in la ansixiyo, Madaxweynuhuna uu saxiixo Sharciga Isgaarsiinta Qaranka oo Baarlamaanka horyaallay laga soo billaabo sanadkii 2005; waxaan dhisnay Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka; waxaa la maal-mariyay xeer-nidaamiyeyaal kala duwan; shirkadaha isgaarsiinta dalka ayaa markii ugu horreysay la siiyay rukhsad rasmi ah oo ku qotonta Sharciga ka dib markii ay Khasnadda Dhexe ee dalka ku shubeen waajibaadkii maaliyaadeed ee laga rabay.

Siyaasadda iyo Istaraatiijiyada Qaran ee ICT waxay ka soo baxday qiimeyn lagu sameeyay heerarka caalamiga ah ee arrintan khuseysa iyo wada-tashiyo kala heer ah oo lala yeeshay dhinacyada daneynaya siyaasaddan, iyadoo la dhageystay aragtidooda.

Siyaasaddan waa tii ugu horreysay ee nooceeda ah, waxaana looga gol leeahay in aragti dawladeed oo mideysan loo sameeyo sidii Soomaaliya looga dhigi lahaa hoggaamiyaha gobolka Geeska Afrika ee dhaqaalaha ku saleysan teknolojiyada. Sidoo kale, siyaasaddani waxay halbeeg u noqon doontaa sidii loo xoojin lahaa iskaashiga iyo wada-shaqeynta hay'adaha dawladeed iyo kuwa gaarka loo leeyahay ee ka shaqeeya arrimaha isgaarsiinta iyo teknolojiyada.

Aragtida ku xusan siyaasaddani waa mid caalami ah, isla markaana khuseysa xaaladdeena, taas oo ah in bulshadeena loo fududeeyo sidii ay u heli lahaayeen adeegyo isgaarsiineed oo tayo leh, isla markaana la awoodi karo, iyadoo looga faa'iideysanayo sidii loo gaari lahaa horumar dhaqan-dhaqaale.

Ugu dambeyntii waxaan u mahadcelinayaa Golaha Wasiirrada oo ansixiyay siyaasaddan; wasaaradaha nagu beegan ee dawlad-goboleedyada oo ka qeyb galay diyaarinta siyaasaddan; iyo daneeyeyaasha kale ee nagu biiriyay talooyinkooda wax-ku-oolka ah. Waxaan sidoo kale u mahadcelinayaa Midowga Boostada Adduunka (ITU) oo kaalmo farsamo nagu siiyay sidii aan u diyaarin lahayn siyaasad la jaan-qaadi karta adduunka.

Waxaan rajeynayaa in aad nagala shaqeyn doontaan sidii loo fulin lahaa siyaasaddan si sare loogu sii qaado heerka aan maanta ka joogno isgaarsiinta iyo teknolojiyada.



*Md. Eng Cabdi Cashuur Xasan*
*Wasiirka Boostada, Isgaarsiinta*
*iyo Teknoolojiyada Jamhuuriyadda*
*Federaalka Soomaaliya*

**Md. Eng Cabdi Cashuur Xasan**
**Wasiirka Boostada, Isgaarsiinta**
**iyo Teknoolojiyada Jamhuuriyadda**
**Federaalka Soomaaliya**

ICT ee horumarintu kuma saabsana kombiyuutarrada, taleefannada gacanta, iyo internetka, laakiin waxay ku saabsan tahay caawimaad, taageero, iyo tababaridda dadka ee ku xiraya iyaga iyo jaaliyadaha xiriirka, barashada, iyo adeegyada. Tani waxay horseedi doontaa wanaagsanaanta, kordhinta waxsoosaarka shaqada, taageerada hal abuurka, iyo dhiirrigelin koritaan loo dhan yahay.



# SIYAASADDA IYO ISTIRAATIIJIYADDA ICT

## 1.1 HORDHAC

Dokumentigani waxaa ku qoran istaraatiijiyadda Qaranka ee siyaasadda ICT-da ee shanta sannadood ee u dhexeysa 2019-2024. Waxaa siyaasaddan iyo istiraatiijiyaddan ku xusan qaab-dhismeedkii bulshada Soomaaliyeed looga faaiideyn lahaa isticmaalka ICT-da si uu u kaalmeeyo horumarka dhaqan-dhaqaale ee ee dalka.

Ujeeddada Siyaasaddani waa in ay fududayso isbedelka tiknoolojiyadda ah ee Soomaaliya kana dhigtaa kacdoon aqoon iyo ogaal ku dhisan, bulsho aqoon ku dhisan oo loo dhan yahay, iyo in ay dedejiso horumarka dhaqan-dhaqaale ee lagu xaqiijinayo Yoolasha Horumarinta Qaramada Midoobay (Raandhiis) ah.

Siyaasaddan iyo Istiraatiijiyadda ICT-da (Siyaasaddu) waxa ay caddaynaysaa aagagga iyo dhinacyada faro-gelinta lagu samaynayo si loo taageero horumarka waaxda ICT-ga, iyo in la gaaro guud ahaan yoolasha horumarka dhaqan-dhaqaale. Guud ahaan dhinacyada awoodda la saarayo mudda shanta sanadood ahi waa:

- Helitaanka - Kharashka xiriirka iyo xaddiga gaarsiinta shabakadda
- Kaabayaasha Digital ee dalka – Isku xirka xarumaha internetka/IXPs, martigelinta maxalliga ah, magacyada degellada (domain), tayada adeega, iyo ammaanka internetka.
- Dhowrista muwaadinka/adeegsadaha - ganacsiga elektrooniga ah, Khusuusiyadda, dhowrista carruurta.
- Horumarinta khayraadka dadka – aqoonta digitalka ah (digital literacy), xirfadaha ICT-da, waxbarashada elektroonigga ah, Cilmi-baarista & Horumarinta (R&D)
- Muxtawaha – Adeegsiga warbaahinta gudaha ee Online-ka ah, barnaamijyada iyo adeegyada maaliyadeed
- Dowladda elektrooniga ah - Isku-xirka dowladda iyo diyaarinta xogta furan, adeegyada bulshada ee elektrooniga ah sida (dowladda elektrooniga ah, caafimaadka elektrooniga ah, beeraha elektrooniga ah, iyo waxbarashada elektrooniga ah).

Yoolasha ugu waaweyn ee Siyaasadda ee la xiriira dhinacyadaas la soo sheegay waa:

- In la horumariyo qaybaha muhiimka ah ee nidaam-deegaamedka ICT-ga ee loo baahan yahay sidii muwaadiniinta Soomaaliyeed loogu awoodsiin lahaa ICT-da, iyo in fursad loo abuuro fursado ganacsiyada oo cusub, sidaasna lagu taageero gaarista yoolasha horumarka dhaqan-dhaqaale ee Qorshaha Horumarinta Qaranka (2017-2019).
- In la dardargeliyo adeegsiga ICT-ga ee Soomaaliya si loo taageero kordhinta dhaqaalaha iyo adeegyada bulshada ee isa-soo taraaya ee ka jira dhinacyada adeegyada maaliyadeed, xiriirka, caafimaadka iyo waxbarashada.
- In la helo adeegga adeeg isgaarsiineed oo wada gaara dhammaan dalka, iyo in la saxo sinnaan la'aanta laxaadka leh ee ka jirta helitaanka iyo qiimaha/jarista kaabayaasha ICT-ga ee ka jirta magaalooyinka dhexdooda iyo dibaddoodaba, taas oo waafaqsan Qorshaha Soomaaliya ee Istritaatiijiga ah ee Kaabayaasha (2019-2023). Tani waxay koobsanaysaa in dhammaan Maamul Goboleedyada la gaarsiiyo kaabayaasha ICT-ga ee loo baahan yahay.

Sanadkii 2017, Dowladda Federaalka Soomaaliya waxa ay ansixisay Xeerka Isgaarsiinta Qaranka, kaas oo yagleelaly hay'adda ka mas'uulka ah nidaaminta waaxdan – Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (NCA) - isaga oo qeexayay qaab-dhismeedkeeda, habraacyada go'aan gaarista, iyo dhinacyada muhiimka ah ee mas'uuliyaddeeda ah. Sharciga Isgaarsiinta ee Qaranku waxa uu dhidibada u aasayaa deegaan nidaamineed/korjoogis oo tartan leh, oo awood siinaya waaxda, kaas oo garawsan baahida loo qabo in muwaadiniinta dalka oo dhami ay helaan adeegyada xiriir ee codka, qaadweynta (broadbandka) iyo boostada

.Siyaasaddu waxa ay bixinaysaa qaab-dhismeedka istiraatiijiga ah ee Sharciga Isgaarsiinta Qaranka, waxa ayna daneeyayaasha heerarka kala duwan ee dowladda; sida ganacsiyada gaarka loo leeyahay, bulshada rayidka ah iyo dadweeynaha siinaysaa khariidad jid oo waadix ah si loo hago isbedelka dhaqaale, bulsheed, dhaqameed iyo siyaasadeed, iyada oo si wax ku ool ah loo adeegsanayo ICT-ga. ICT-gu waxa uu door muhiim ah ku leeyahay taageerista horumarinta dhaqan-dhaqaale, isaga oo saamayn togan ku leh shaqo-abuurka, bixinta adeegyada daryeelka caafimaad, waxbarashada iyo cilmi baarista iyo ka qaybgalka muwaadiniinta ee arrimaha qaranka. Si kasta ha noqotee, in faa'idada ugu badan laga helo tiknoolajiyadahani waxa ay u baahan tahay siyaasado waafi ah oo ICT-ga ka eegaysa dhinacyo badan. Tusaale ahaan, waxaa kamid ah dhinacyada waxbarashada, caafimaadka, maaliyadda, awoodsiinta iyo isbedelka bulsheed, shaqo bixinta, iyo horumarka dhaqaale.

Sidaas awgeed, Siyaasaddu waxa ay doonaysaa in ay wax ka qabato kaabayaasha ICT-ga iyo daldaloollada kale ee ka jira nidaam-deegaameedka, iyada oo adeegsanaysa qalabyo siyaasadeed iyo tallaabooyin adeegsanaya faragelinnada dhanka sahayda/cardiga iyo dalabka ee suuqa. Waxaa la filayaa bixinta khayriyadaha/barnaamijyada ICT-ga ee loo baahan yahay iyo taageerada midaysani inay wax ka tari doonto dhismaha bulsho isku-xiran oo dhaqaale ahaan madax bannaan.

## SOO KOOBISTA DHINACYADA WAAWEYN EE SIYAASADDU AWOODDA SAARAYSO

- Qaab-dhismeedka siyaasadeed, sharci, iyo nidaamineed.
- Adeegyada xiriirka guud – codka iyo internetka qaadweeynta ah.
- Istiraatiijiyada ICt-ga lagu gaarsiinayo dadka oo dhan ( adeegsiga ICT-ga ee deegaannada adeeggu ku yar yahay, haweenka, dhalinyarada, dadka laxaadka la', iyo kooxaha la takooro)
- Kaabayaasha aasaasiga ah ee dhammaan Dowlad Goboleedyada - Khadadka laf-dhabarta ah oo maxalli iyo caalami ba ah, jeegaanta raadiyaha ( radio spectrum), isku-xirnaanta (interconnection) shabakadaha.
- Kaabayaasha digitalka ah - baraha isweydaarsiga internetka, amaanka internetka, khayriyadaha/barnaamijyada lacag-bixinta.
- Dhowrista adeegsadaha, khusuusiyadda (privacy) iyo dhowrista carruurta.
- Horumarinta khayraadka dadka – waxbarashada, tabobarka, hal-abuurka, cilmi baarista iyo horumarinta.
- Adeegyada iyo muxtawaha digital-ka ah - ganacsiga elektrooniga ah, adeegyada maaliyadeed, warbaahinta, maamulka dowladeed, caafimaadka, waxbarashada, iyo beeraha.
- Horumarinta adeegyada boostada.

## 1.2 LA JAANQAADISTA/WAAFAQSANAANTA SIYAASADDA ICT-GA EE HESHIISYADA HEER QARAN, GOBOL IYO CAALAMI

Wasaaradda qorshayntu waxa ay ku gudo jirtaa hanaanka dejinta Qorshaha Horumarinta Qaranka (NDP) oo cusub, kaas oo bedeli doona qorshaha iminka (2017 -2019). Siyaasaddan ayaa laga tixraacayaa qaybta qorshaha horumarka qaranka ee ku saabsan ICT-ga, si loo hago horumarkeeda, iyo in ay isla jaanqaadaan siyaasadda iyo qorshaha horumarinta qaranku. Dhankaas marka laga hadlayo, Siyaasaddu waxa ay doonaysa inay taageerto hiraalka muddada fog ee qaranka ee ku aaddan horumarka dhaqan-dhaqaale iyo Yoolasha Horumarka Waara ee 2030-ka, oo ay qayb ka tahay isbeddel dhaqaale, isku-xirnaan qaran, horumar dadeed, maamul dadweyne iyo ammaan, iyo qodobadda isu-tallaaba (tusaale, sinnaanta jinisga iyo dadyawga laxaadka la').

Caalamiyan, Yoolka SDG 9c waxa uu dhigayaa in dalalka caalamka ugu horumarka yar  ay helaan adeegyada xiriirka marka la gaaro sanadka 2020. Soomaaliya iyo dalal kale oo badan in ay gaaraan yoolkani way adagtahay haddii aan lala iman dedaal isku-dubaridan oo la iska kaashaday oo hubinaya in helitaanka ICT-gu uu fudaydinayo horumarka la qorsheeyay in laga gaaro dhammaan SDGs-ka. Heshiisyo iyo ballanqaadyo badan oo leh heer qaran iyo heer gobol ayaa waafaqsan hiraalkan caalamiga ah ee ah in dadku wada helaan shabakadda xiriirka oo jaban, oo ay kamid yihiin heshiisyada ay gaareen Dalalka Bariga Afrika iyo Midowga Afrika.

Yoolasha ay dejisay Guddiga Qaramada Midoobay ee Qaadweyntu (broadband) ayaa bixinaya hiigsiyo sii faahfaahsan:

- Marka la gaaro 2025, dalalka oo dhami waa in ay lahaadaan qorshe ama istiraatiijiyad qaadweynta (broadband) oo la maalgeliyo, ama ay qaadweynta ku daraan qeexitaanka helitaanka dadka oo dhan ee adeegga.
- Marka la gaaro 2025, adeega qaadweynta ee heerka bilowga ah waa in uu noqdaa mid ay jari (awoodi) karaan dadka dalalka soo korayaa, iyada oo qiimihiisu ka yar yahay 2% celceliska dakhliga billeha ah ee qof kasta.
- Marka la gaaro 2025-ka, gaaritaanka adeegsiga dadweynaha ee qaadweyntu waa in uu gaarsiisnaada:
  a. 75% caalamka oo dhan
  b. 65% dalalka soo koraaya
  c. 35% dalalka ugu horumarka yar (LCDs)
- Marka la gaaro sanadka 2025-ka, 60% dhalinyarada iyo dadka qaan-gaarka ahi waxay ugu yaraan leeyihiin heerka ugu hooseeya ee aqoonta xirfadaha elektrooniga ah oo raandhiis ah.
- Marka la gaaro sanadka 2025-ka, 40% dadweynaha caalamku waa in ay adeegsanayaan adeegyada maaliyadeed ee elektrooniga ah.
- Marka la gaaro sanadka 2025-ka, xiriir la'aanta ganacsiyada yaryar iyo kuwa heerka dhexe ee waax kasta waa in la dhimaa 50%.
- Marka la gaaro sanadka 2025-ka. sinnaanta jinsiga waa in la gaaraa dhamaan hiigsiyada.

Waxaa la aqoonsaday in arrimo badan ay tahay in wax laga qabto si loo helo nidaam-deegaaneedka ICT-ga ee ugu wanaagsan, kaas oo suurtogeliya in uu koriyo horumarka loo qaadayo dhanka hiigsiyada isku-xirka ee SDG-ga, iyo ballanqaadyada kale. Tusaale ahaan, hoosaynta heerka aqoonta elektrooniga ah, maqnaanshiiyaha muxtawaha maxalliga ah, arrimaha ammaanka, sinnaan la'aanta jinsiga, iyo jiritaan la'aanta ilaha tamarta oo jabani waxa ay kamid yihiin caqabadaha waaweyn ee ay tahay in wax laga qabto.

Siyaasaddani waxa ay garawsan tahay baahida loo qabo in xisaabta lagu darsado xawaaraha sare ee uu ku socdo horumarka ICT-gu, sida farsamada soo baxaysa ee Internetka Walxaha (IoT), Garaad Gacmeedka (artificial Intelligence), Robootiska, iyo Adeegyada Mashiin ilaa Mashiin kale, Dhexdhexaadnimada Internetka (Internet Neutrality), Xogaha baaxadda leh (Big Data), farsamooyinka Blockchain iyo Crytocurrency-ka. Tiknoolajiyadahaasi marka ay sii horumaraanba, Siyaasaddu waxa ay u baahanaysaa in dib u eegis lagu sameeyo oo wax looga bedelo marba sida loo baahdo.

# 2. HIRAALKA, HIIGSIGA IYO MABAADI'DA SIYAASADDA ICT-GA

## 2.1 BAYAANNADA HIRAALKA IYO HIIGSIGA

Hiraalka Siyaasadda iyo Istiraatiijiyadda ICT-gu waa:
In dheefaha suurtogalka ah ee ICT-ga looga faa'idaysto taageerista horumarka dhaqaale iyo iskuduubnida Soomaalida oo dhan.

Hiigsiga Siyaasadda iyo Istiraatiijiyadda ICT-gu waa;
In uu hago maalgashiga nidaam-deegaameedka ICT-ga iyo in uu fudaydiyo u adeegsiga ICT-ga waxtarka dadka Soomaaliyeed.

Hiraalka iyo hiigsigu waxa ay koobsanayaan ujeeddada Siyaasadda ee ah hubinta jiritaanka kaabayaal adkaysi leh oo taageera isku-xirnaan ballaaran, si loo soo jiito maalgashi, loona dhiirigeliyo fursadaha shaqo abuurka. Tani waxay u baahan tahay tallaabooyin daneeyayaasha oo idil - wakaaladaha dowladda, waaxda gaarka ah, bulshada rayidka ah, bahwadaagta horumarka iyo warbaahinta- ku dhiirigeliya in ay door ka ciyaaraan dedaalka lagu xaqiijinayo himilooyinka Siyaasadda ee aagagga isgaarsiinta iyo horumarinta kaabayaasha internetka, karaanka dadka iyo xirfadaha elektrooniga ah, samaynta muxtawaha, kobaca adeegsiga internetka iyo adeegsiga istiraatiijiga ah ee badeecadaha, amaanka iyo budhcadnimada internetka, tayada adeegga iyo wax ku oolnimada shabakadaha qaadweynta, iyo ka qaybgalka bulsho ee muwaadiniinta oo idil.

## 2.2 MABAADI'DA AASAASIGA AH

- ICT-gu door muhiim ah ayaa uu ku leeyahay dhiirigelinta horumarka dhaqan-dhaqaale ee qaranka, casriyaynta iyo caalamiyaynta dhaqaalaha Soomaaliya.
- Adeegsiga wax ku oolka ah ee ICT-gu waxa ay wax ka tari kartaa gaarista heerka ugu sarreeya ee ka qaybgalka dhammaan qaybaha bulshada ee maamulka/dowladnimada, midnimada qaranka iyo horumarka dhaqan-dhaqaale.
- Kaabayaasha ICT-ga ee dalka oo jaban meel kasta laga heli karaa waxa uu shardi u yahay xaqiijinta ujeedooyinka ka mid ahaanshaha iyo ka qaybgalka qaran.
- Qaab-dhismeed sharci iyo nidaamin oo awoodsiin lihi waxa uu fure u yahay fudaydinta maalgashiga iyo kobaca waaxda ICT-ga.
- Horumarinta dadka iyo farbarashada elektrooniga ahi waxa ay aasaasi u yihiin in faa'idada ugu badan laga helo ICT-ga.
- Iskaashiga ganacsiga gaarka ah ee ICT-ga iyo Dowladdu waxa uu lama huraan u yahay xaqiijinta hiigsiyada istiraatiijiga ah ee Soomaaliya, oo ay kamid tahay in si waxtar leh oo miisaaman loo canshuuro waaxda, taas oo hubinaysa in waaxda gaarka ahi ay si caddaalad ah qaybteeda ugu biiriso Khasnadda Qaranka.

# 3.0 XAALADDA IYO MUSTAQBALKA WAAXDA ICT-GA

## 3.1 IS-GAARSIINTA IYO INTERNETKA

### 3.1.1 XIRIIRKA MAYLKA UGU DANBEEYA

Waaxda isgaarsiiinta iyo internetka Soomaaliya waxa ay ka kooban tahay shirkadaha taleefannada gacanta iyo adeegsadayaashooda, oo ka dhigan 35-40% dadweynaha, taas oo shaqaalaysiisa ku dhawaad 25,000 oo Soomaali ah. Iminka, suuqu waxa uu ka kooban yahay shan shirkadood oo waaweyn (Hormuud, Somtel, Golis, Telesom, Nationlink) iyo laba MVNO (SomNet iyo SomLink). Shirkadahaasi kaalinta koowaad waa Shirkado Shabakado Moobil (MNO-yo) oo bixiya adeegyo cod iyo internet, adeegga ugu badan waxa ay siiyaan magaalooyinka iyo deegaannada ku xeeran, waxayna leeyihiin ku dhawaad afar milyan oo macmil. Golis Telecom, Telesom, SomNet iyo Hormuud waa ay isku xiran yihiin, halka Somtel ay tahay shirkad ay leedahay Dahabshiil oo ay isku xiran yihiin SomLink. Nationlink saamigeeda suuqu aad ayuu u yar yahay, halka Somaphone ay dansan tahay, in kasta oo ay Muqdisho ku leedahay shabakad shaqaynaysa. Amal Telecom hadda ayaa la aasasayaa - waxa ay samaysay maalgashi balse weli ma ay bilaabin adeeg. Haatan, NCA waxa ay ku jirtaa hannaanka muhiimka ah ee nidaaminta suuqa, iyada oo bixinta rukhsadaha kala gorgortamaysa shirkadaha adeegyada bixiya ee jira.

Suuqa xarkaha sugan ee Soomaaliya dhawaan ayuun buu bilaabay in uu horumaro, waxaana imminka jira shabakado adeegsada xarkaha fibre-ka oo xawaarahoodu sarreeyo oo la geliyay xafiisyada dawladda, ganacsiyada iyo guryaha ku yaal magaalooyin dhowr ah.

Adeegsiga internetka ee Soomaaliya marka meelaha kale la barbardhigo waa uu hooseeyaa, iyada oo ay adeegsadaan ku dhawaad 10% dadweynuhu. Sababtu qayb ahaan waxaa la dhihi karaa xaaladda amni ee dalka, iyo sida oo kale jiritaan la'aanta ilo tamareed sugan, taas oo carqaladaysay horumarka waaxda ICT-ga, oo ay garab socoto dalabka oo yar oo ay sabab u tahay hoosaynta farbarashada iyo xirfadaha ICT-ga ee qaybo badan oo kamid ah bulshada. Si kasta ha noqotee, ICT-ga, iyo gaar ahaan taleefanka gacantu, waxa uu kamid yahay waaxyada ugu koritaanka badan, taas oo soo saarta faa'idooyin, waana waaxda ganacsi ee saddexaad ee ugu weyn dhaqaalaha dalka marka la eego dhanka shaqaalaysiinta.

Hadafka ugu weyn ee Siyaasadda ee la xiriira horumarinta shabakadda ee mustaqbalku waa hubinta in dadka Soomaaliyeed oo dhami ay helaan adeegyada codka iyo internetka broadbanka oo jaban, taas oo buuxinaysa halbeegyada waxqabadka ee caalamiga ah. Waxaa la filaayaa in shirkadaha gaarka loo leeyahay ay buuxin doonaan baahiyaha maylka ugu dambeeya ee xiriirka ee inta badan bulshooyinka aan shabakadda ku xirnayn marka la yagleelo kaabayaal badan oo kharash yar, oo ay garab socoto qodobada kale ee deegaanka awoodsiinaya ganacsiga, sida helitaanka jeegaanta raadiyaha (radio spectrum) iyo nidaaminta shirkadaha awoodda baaxadda weyn ku leh suuqyada deegaannada iyo badeecadaha gaar ah. Si loo gaaro saboolka ugu saboolsan ee deggan goobaha sida weyn u xayiran, waxaa loo baahan karaa taageero dowladeed oo dheeraad ah. Arrinkan waxaa lagu qiimaynayaa dib-u-eegista Siyaasadda ee sannadkiiba labada jeer la sameeyo.

### 3.1.2 KAABAYAASHA LAF-DHABARTA AH

In kasta oo qaar kamid ah shirkadaha isgaarsiintu ay dhisteen shabakadahooda lafdhabarta oo ah microwave iyo fibre, Soomaaliya ma laha suuq furan oo tartan geli kara oo heer qaran iyo caalami ah - taas oo shardi u ah horumarka waaxda ICT-ga. Taas waxaaa ka dhalatay in kobaca adeegsiga internetka ay xaddidayaan labada arrimood ee ah qaali ahaanshaha/kharashka badan ee ballac-liidka (bandwith) caalamiga ah, iyo jiritaan la'aanta kaabaha lafdhabarta fibre optic-ga oo aan ka jirin Muqdisho meel ka baxsan si uu isugu xiro xarumaha internetka ku soo degayo iyo laamaha kale ee magaalooyinka dalka.

Marka la helo lafdhabar fibre ah oo heer qaran ah oo meel kasta gaarsiisan, goobta istiraatiijiga ah ee Soomaaliya ku taallo iyo xarkaha caalamiga ah ee badan ayaa looga faa'idaysan karaa waaxda ICT-ga ee dalka iyo dadweynahaba. Soomaaliya waxa ay u dhowdahay shabakado xarko internet oo badan oo isku xira Yurub, Bariga Dhexe, Hindiya iyo Marinka Cadmeed. Fursaddan qaabka ugu sarreysa si looga faa'idaysto, mawqif furan ayaa laga qaadanayaa rukhsad siinta xarumaha xarkaha internetka, waxaana la dhiirigelinayaa tartanka adeegga sii-marka (Gateway) ee caalamiga ah.

Ku xirnaanta caalamka ee Soomaaliya waa ay isa soo tartay sanadihii ugu dambeeyay kadib markii xariga badda hoos mara ee EASSy ka soo dagay Muqdisho, iyo xariga Somcable ee dhulka mara ee Jabuuti ku xiran, kaas oo ka faa'idaysanaya tirada badan ee xarkaha badda hoos mara ee ku sugan deegaanka si uu awood heer caalami ah ugu helo qiimo jaban. intaas waxaa dheer, Xariga ka soo degay Boosaaso ee laga keenay Cummaan waxaa isticmaala Golis Telecom, halka xarko dhulka soo mara oo ka imanaya Itoobiya iyo Kenya lasoo gaarsiiyay soohdinta Soomaaliya.

Xarigga Djibouti Africa Regional Express (DARE) ayaa mustaqbalka isku xiri doona Jabuuti, Berbera, Muqdisho, Bosaso iyo Moka (Yaman). Sida oo kale, xarkaha PEACE iyo AfricaOne iyo xarkaha kale ee fibre optic-ga ah ee badda hoosteeda dhan mara xeebta Bariga Afrika sida, SEACOM iyo TEAMS, ayaa la filayaa inay soo galayaan suuqa Soomaaliya.

Kaabayaal maxalli ah oo fibre ah in loo adeegsado isku xirka magaalooyinka dalku waa mudnaanta koowaad, waana lagama maarmaan si loo hubiyo in dalka oo dhami uu helo adeegyo internet oo jaban. Meel kasta oo ay suurtogal tahay, shabakadda lafdhabarta ee dalku waxa ay mudnaanta siinaysaa in la adeegsado xariga fibre optic-ga ah, sababta oo ah awooddiisa shabakadeed ee sarraysa - daboolista dalabka laga filayo magaalooyinka waaweyn dhaqaale ahaan suurtogal maaha haddii la isticmaalo xalal aan ahayn fibre optic sida dayax-gacmeed (satelite) ama microwave radio. Si kasta ha noqotee, qaabkii hore ee dayax-gacmeedku door muhiim ah ayuu yeelanayaa muddada ku meel gaarka ah ee ka horraysa inta aan la helin kaabayaasha dhulka. Waxa uu sida oo kale muhiin u yahay u adeegidda dhulka miyiga ah ee durugsan, iyo sidoo kale baahinta telefishanka iyo xarkaha backup-ka. Mustaqbalka waxaa laga yaabaa inay suuqa qasaan khayriyadaha Sarreeyaa (HAPs) oo cusub, iyo kooxaha dayaxgacmeedyada dhulka ugu wareegaya sarraynta hoose (LEOs), iyaga oo keenaya adeegyo qaadweyn oo jaban.

Odoroska hordhaca ahi waxa uu muujinayaa in $67- $100 milyan oo doolar ay ku baxayso dhismaha shabakadda lafdhabrta ah ee la doonayo ee ka samaysan xarkaha fibre optic-ga ah. In la isku daro dhismaha shabakadan iyo dib-u-dhiska waddooyinka ee qorshaysani kharash badan ayay ka dhimi kartaa odoroskan, iyadoo isla markaasna gaaraysa magaalooyin iyo dhul miyi ah oo dheeraad ah, korna u qaadaysa adkaysiga shabakadda marka lagu gudo jiro wejiyada ku xiga, taas oo u baahan doontaa maalgashi dheeraad ah.

### 3.1.3 ISKU-XIRKA SHIRKADAHA IYO MARTIGELINTA DALKA GUDIHIISA

Shirkado tiro yar oo kamid ah shirkadaha taleefanada codka ayaa isla xiriiri kara (isgala), in kasta oo shirkadahaas laga yaabo qaar kamid ahi inay isgalaan caalamiyan, ama ay isku galaan heshiisyo laba-geesoodle ah oo si gaar ah uga dhaxeeya. Isgalid la'aantaasi waxa ay keentay tartanka suuqa oo yar iyo liidashada tayada adeegga. Si arrinkan wax looga qabto, waxaa la sameeyay qabyo-qoraalka Nidaamiyaha Is-galka shabakadaha taleefannada oo leh xeerar iyo hagayaal cadcad oo khuseeya shirkadaha haysta rukhsadaha.

Adeega internetka shirkaduhu waa ay is galaan caalamiyan, sababta oo qayb ahaan ah liidashada dhaqdhaqaaqa internetka ee dalka. Haseyeeshe, marka la eego kororka xowliga ah ee adeegsiga internetka, iyo ballaarashada shabakada heer qaran ee lafdhabarta ah, iyo adeegyada martigelinta, dhawaan waxaa loo baahanayaa in dhaqdhaqaaqa internetka ee dalka la mariyo dalka gudihiisa si loo helo adeegyada xasuusta kaydka ku-meelgaarka ah ee la wadaago (shared cache) iyo adeegyada la xiriira oo loo baahan yahay in laga helo Soomaaliya.

Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta iyo Tiknoolojiyadda (MPTT) ayaa hannaankan fudaydinaysa iyada oo Muqdisho ka yagleelaysa Xarunta Isweydaarsiga Internetka Soomaaliya (IXP) ee ugu horraysay – xaruntan oo la yidhaahdo Somali Internet Exchange Point (SoIXP). Marka shirkadaha internetka bixiyaa ay ku xirmaan IXP-ga, waxaa dhinmaya dib-u-dhaca adeegga (latency), waxaa kobcaya tartanka iyo waxqabadka, waxaa dhinmaya kharashka howlgalka shabakooyinka, waxaana mug yeelanaya adeegyada dheeraadka ah.

## 3.2 BAAHINTA

Idaacadda ayaa ah hilinka xiriirka ee ugu muhiimsan Soomaaliya. Waxaa jira tobanaan idaacadood oo FM ah, iyo telefishinno dhuleed iyo dayax-gacmeed oo tiradoodu kordhayso. Waa ay kooban tahay dhulka ay gaaraan Inta ugu badan idaacadaha FM-ka ee Soomaaliya - waxay ka shaqeeyaan magaalooyinka ay ka dhisan yihiin iyo deegaannada ku hareeraysan, mana jirto idaacad Soomaaliya ka dhisan oo dalka oo dhan laga dhagaysto.

Mudooyinkii u danbeeyay, telefishanka ayaa shacbiyad aad u badan ka helay magaalooyinka, ha noqoto guryaha gaarka ah ama goobaha caamka ah iyo goobaha wax lagu daawado. Telefishanka dowladdu isna waxa uu ka mid yahay deegaanka warbaahinta ee dalka, iyada oo warbaahinta internetku iyana ay kobacday iyada oo ay jiraan bulsho firfircoon oo degello iyo baro bulsheed ah, oo ay ka mid tahay Golaha Warbaahinta Soomaaliya (SMC).

Si ay u hindisto xeer iyo xeer-nidaamiyayaal baahineed, MPTT waxa ay la shaqaynaysaa Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Dalxiiska (MOITC) iyo NCA oo bixisa rukhsadaha farsamo iyo wasaaradaha warfaafinta ee gobollada, oo ah hay'adda ka masuulka ah muxtawaha. Qodobka 33-aad ee Xeerka Warbaahintu waxa uu tibaaxayaa Adeegga Baahinta ee Guud (PBS) isaga oo qeexaya qaab-dhismeed sharci oo ilaalinaya adeeg tifotir ahaan madaxbannaan.

Marka laga yimaaddo hubinta caddaalad ahaanshaha qoondaynta jeegaanta loogu talogalay baahinta, NCA waxa ay masuul ka tahay in adeegsiga jeegaanta laga raro adeegyada analogga (analogue) ah. NCA waxa ay ku gudojirtaa diyaarinta qabyo-qoraalka Istiraatijiyadda u Guurista habka Digitalka ah oo lagu fulin doono hannaan wadatashi daneeyayaal-badan, si la isugu keeno dowladda, nidaamiyaha, baahiyayaasha, dhinacyada qaybiya ishaarooyinka (signals), ganacsatadda iyo kooxaha midowga macaamiisha, si loo hubiyo isla-jaanqaadka waaxda jeegaanta raadiyaha, si waafaqsan habdhaqanka caalamiga ah.

## 3.3 ADEEGGA BOOSTADA

Adeegga boostadu waxa uu istaagay intii lagu jiray dagaalkii sokeeye, haseyeeshee, iyada ooo la eegayo muhiimadda uu leeyahay shaqaynta waaxaha gaarka ah iyo ta guud, MPTT waxa ay dib u yagleeshay Posta Somalia oo si buuxda u shaqaynaysa, taas oo isku xirta Soomaaliya gudaheeda iyo caalamka intiisa kale iyada oo la adeegsanayo sii-mar boosto (postal gateway) oo ah Jabuuti.

MPTT waxa ay hiraalinaysaa habraac cusub oo lagu maamulayo, loona howlgelinyo adeegga boostada, kaas oo ku salaysan mabaadi'da ganacsiga, ka faa'idaysiga tiknoolajiadda si loo kordhiyo wax-ku-oolnimada adeegga, iyo samaysashada bahwadaag caalami ah kuwaas oo u faa'ideeya dadka Soomaaliyeed, iyada oo taageeraysa hindisayaasha halabuurka ganacsi. Tani waxay xisaabta ku darsanaysaa dhiirigelinta maalgashiga iyo joogitaanka adeegyada boostada gaarka ah ee maxalliga ama caalamiga ah. Taasi waxa ay dardargeliye u noqonaysaa ganacsiga elektrooniga ah ee dalka, waxa ayna sii wanaajinaysaa silsiladda saadka ganacsiga ee hore u jiray, oo labaduba kamid ah arrimaha mudnaanta ay siinayso MPTT. Si arrinkan loo taageero waxaa sida oo kale la horumarinayaa xiriirka ka dhaxeeya adeegga boostada iyo qeybaha ganacsiga, taas oo sare u qaadaysa deegaanka ganacsiga xawilaadda lacagta.

Si loo hubiyo in boostadu awood u leedahay daboolista baahiyaha laga filayo adeeggan, waxaa loo baahanayaa in la dejiyo siyaasad u gaar ah boostada. Taas waxaa kamid ah in la yagleelo nidaam cinwaaneed digital ah  oo heer qaran ah (NAS/  National digital adressing system) iyo nidaam maamul xogeed oo ku saabsan Xogta Deegaaneed ee Qaranka oo taageeri kara nidaamka qaranka ee cinwaanaada boostada.

## 3.4 BARNAAMIJYADA LACAG-BIXINTA EE ELEKTROONIGA AH

Adeegyada lacag bixinta elektrooniga ah ee Soomaaliya si wanaagsan ayay u horumarsan yihiin. 9 kamid 10 kii qof ayaa si joogto ah moobilkooda u adeegsada  in ay helaan adeegyada lacag bixinta taleefanka gacanta, iyada oo la sameeyo 150 milyan oo dhaqdhaqaaq bil kasta, oo dhan 2.7 bilyan  oo u dhiganta 36% GDP-ga dalka.

Waxaa loo baahan yahay in la xoojiyo qaab-dhismeedka sharci iyo nidaamineed ee waaxdan si loo hubiyo:

- Waax maaliyadeed oo loo dhan yahay
- Horumarinta adeegyo maaliyadeed oo dhinacyo badan, oo ay kamid tahay lacag-bixin dibadeed iyo adeegyo bangi.
- Isku-xirnaanta/Isku-shaqaynta
- Xasiloonida maaliyadeed ee nidaamka lacag bixinta moobilka ee hadda jiro, iyo
- Muwaadiniintu inay helaan dhowris ku filan

Waxa ay u badan tahay in loo baahan doono in wax ka bedel lagu sameeyo Xeerka Hay'adaha Maaliyadeed ee 2012 si uu u koobsado dhammaan dhinacyada bixiya adeegyaada maaliyadeed, iyo in la hubiyo in hal sharci wada maamulo dhammaan hay'adaha bixiya adeegyada maaliyadeed, ayna galaangal isku mid ah u leeyihiin kaabayaasha la wadaago ee suuqa maaliyadeed sida nidaamyada lacag-bixinta iyo nidaamka maamulka kaararka aqoonsiga,  sidaasna lagu abuuro suuq maaliyadeed oo taageeraya adeegyada la wadaago, xaqsoorna u ah hay'adaha soo galaya suuqa.

# 4.0 UJEEDDOOYINKA IYO ISTIRAATIIJIYADAHA SIYAASADDA

Hadafka aasaasiga ah ee siyaasadda iyo Istiraatiijiyadda ICT-gu waa in la hubiyo in muwaadiniinta Soomaaliyeed ay awood u leeyihiin in ay si buuxda uga faa'idaystaan awoodda weeyn ee ICT-gu u leeyahay dedejinta horumarka iyo abuurista hanti iyo shaqooyin cusub. Si loo xaqiijiyo hiigsigan, loogana dhabeeyo hiraalka siyaasaddan, waxaa la aqoonsaday oo la cayimay ujeedooyin siyaasadeed oo ku saabsan waaxyo-hooseedyada isgaarsiinta, baahinta, boostada, lacag-bixinta elektrooniga ah, iyo nidaamyada maamulka xogta, iyo sidoo kale arrimaha isu-tallaabaya iyo kuwa soo ifbaxayahaya.

## 4.1. YOOLASHA SIYAASADDA

Yoolka guud waa in Siyaasadda laga helo qaab-dhismeed guud iyo khayriyad hubisa in Soomaaliya leedahay fursad ay si weyn uga faa'idaysato kacaanka xogta iyo xiriirka. Yoolasha cayiman ee siyaasaddu waa:

- In kaabayaasha ICT-ga lagu fidiyo dhamaan gobolada Soomaaliya iyada oo magaalooyinka iyo magaalooyinka gobol hoosaadka lagu xirayo shabakad qaadweyn oo la isku hallayn karo.
- In la hubiyo in horumarinta kaabayaasha ICT-ga uu noqodo mid isku-dubaridan oo isla jaanqaadaya, iyada oo laga digtoonaanayo ku celinta iyo luminta khayraadka.
- Ababinta horumarka adeegyada dowladda ee elektrooniga ah si loo taageero horumarka dhaqaalaha Soomaaliya.
- In sare loo qaado horumarinta ganacsiga iyo waaxda maaliyadda ee elektrooniga ah oo firfircoon.
- In la hindiso siyaasad iyo habraaciyo  iyo dhowris muwaadin oo togan iyo tallaabooyinka difaaca internetka ee dhammaan kaabayaasha ICT-ga.
- In la dhiirigeliyo wadashaqaynta ka dhaxaysa maamulayaasha siyaasadda ICT-ga ee waaxaha dowladda.
- In la ababiyo hal-abuurka wadaniga ah ee sayniska, xirfadaha elektrooniga ah iyo tiknoolajiyadda, taas oo keenaysa abuurka degdegga ah ee shaqooyin iyo hanti cuusb.
- Hogaaminta horumar loo dhan yahay oo ay qayb ka yihiin dumarka iyo kooxaha la faquuqo.
- In si togan loo dhiirigeliyo galaangalka dadka oo dhan (Universal Access) oo ay helaan adeegyada codka iyo internetka, iyada oo la adeegsanayo farsamooyinka iyo qaab ganacsiyeedka ugu casrisan uguna habboon.
- In la hubiyo in dalku si ku filan uga qaybgalo heshiisyada iyo golayaasha heer gobol iyo caalam ee ICT-ga si loo dhiirigeliyo horumarka ICT-ga. Waxay arrintani koobsanaysaa xubinnimada WTO iyo ITU, ku biirista EACO iyo saxeexidda heshiiska caalamiga ah ee dembiyada internetka, iwm.
- Hubinta in dhammaan waaxaha muhiimka u ah isbedelka Soomaaliya ay si togan u qaataan tiknoolajiyadda ICT-ga, gaar ahaan waxbarashada, caafimaadka, tamarta, jidadka iyo gaadiidka, beeraha, ganacsiga, maaliyadda, warshadaha, iwm.
- Muwaadiniinta Soomaaliya in awood loo siiyo in ay si buuxda uga faa'idaystaan adeegga qaadweynta, taas oo ka dhigaysa bulsho xog ogaal ah oo la tartamaysa asaageed, awoodna u leh inay ka qaybqaadato horumarka dhaqan-dhaqaale ee dalka.
- In la sii xoojiyo dedaallada dowladda ee dhiirigelinta halabuurka, taageerista daahfurnaanta, awoodsiinta muwaadiniinta, dhiirigelinta isla-xisaabtanka iyo sii wanaajinta bixinta adeegyada bulshada, iyada oo la adeegsanayo Xogta Furan (Open Data)

## 4.2. ARRIMAHA MUDNAANTA LEH

Arrimaha mudnaanta weyn u leh waaxda ICT-ga Soomaaliya waxaa yeerinaysa caqabadaha horumarka hourmarka ee lagu faahfaahiyay Qorshaha Horumarka Qaranka, iyada oo xisaabta lagu darsanayo himilooyinka heer gobol iyo caalam, gaar ahaan Yoolasha Hormarka Waara (SDGs) iyo istiraatiijiyadda "abuurista waaxda gaarka ah oo firfircoon, cuddoon oo tartami karta, taas oo wax ku biirisa horumarka dhaqaale ee Dowladda Federaalka ah ee Soomaaliya". Iyada oo arrimahaas laga shidaal qaadanayo, arrimahan soo socda ayaa ah dhinacyada tallaabooyinka siyaasadeed ee mudnaanta leh laga qaadayo – arrimahan oo ay tahay in la dhammaystiro marka la gaaro sanadka 2024:

- Fidinta shabakadda kaabayaha lafdhabarta qaranka si dhammaan magaalooyinka waaweyn loogu xiro xarko labajeer dhac ah (si loo hubiyo isku hallaynta), iyo sida oo kale wax ka qabashada caqabadaha xiriirka maylka ugu dambeeya, si loo hubiyo in dadka oo dhami ay helaan qaadweynta, oo ay kamid tahay isku-xirnaanta shirkadaha isgaarsiinta oo wax ku ool ah iyo ballaarinta gaarista adeega 3/4G ee taleefannada gacanta.
- Dhisidda seeska shabakadda fibre ka ee dowlad goboleed kasta oo ka tirsan federaalka muddada ka dambaysa 2024ka.
- Yagleelidda xarunta datada dowladda oo leh backup (dacmi) cloud ah.
- Shirkada isgaarsiintu inay ka qaybgalaan wadaagga kaabayaasha iyo siyaasadaha hal-mar-qod, oo ay taageerayso horumarinta shabakadaha korontada/iwm ee kale.
- Hubinta dhowrista kaabayaasha lama huraanka ah - yagleelista Kooxda Ammaanka iyo Dhowrsanaanta Internetka, si ay u korjoogto horumarka iyo dhaqangelinta siyaasadaha qaranka ee ammaanka internetka, iyo in ay horumariso Kooxda Falcelinta Degdegga ah ee Kombiyuutrka (CERT)
- Fududaynta kobaca doorka dumarka, dhalinyarada iyo dadka laxaadka la' ee ICT-ga.
- Yagleelidda adeegyada elektrooniga ah ee dowladda sida nidaamyada Xogta-da Furan.
- Horumarinta adeegsiga ICT-ga ee waaxaha muhiimka ah ee caafimaadka, waxbarashada, cilmibaarista, beeraha iyo wershadaha.
- Hubinta in dhammaan xeerarka dalku ay ka turjumayaan baahida loo qabo dhiirigelinta ganacsiga elektrooniga ah, iyada oo la hubinayo dhowrsanaanta data-da internetka, ilaalinta carruurta iyo in maxkamaduhu ay aqbalayaan caddaymaha elektrooniga ah.

## 4.3 GUUDMARKA YOOLASHA ISTIRAATIIJIGA AH IYO WAKHTIGOODA

| TALLAABADA | YOOLASHA ISTIRAATIIJIGA AH | WAKHTIGA |
|---|---|---|
| **Sii wanaajinta siyaasadda/ qaab-dhismeedka nidaamainta** | • Dhammaystirka dib u eegista siyaasadaha iyo sharciyada goboladda ee jira, iyada oo la qorshaynayo in la iswaafajiyo marka loo baahdo.<br>• Dejinta xeerarka iswaafajinta siyaasadaha/sharciyada jira<br>• Cusboonaysiinta sharciyada/ siyaasadaha jiray, dejinta siyaasado/sharciyo cusub sida loogu baahdo (tus, adeegyada maaliyadeed ee digitalka ah, adeegyada boostada, mucaamalaadka elektrooniga ah, dhowrista carruurta iwm, iyo kuwo kale sidii loogu baahdo). | • Sanadka 1aad<br>• Sanadka 1aad<br>• Sanadka 3aad |
| **Ammaanka elektrooniga ah** | • Aasaaska guddiga la talinta amniga elektrooniga ah ee qaranka.<br>• Dejinta qabyoqoraalka siyaasadda amniga elektrooniga ah<br>• Qaadashada xeerka amniga elektrooniga ah | • Sanadka 1aad<br>• Sanadka 2aad<br>• Sanadka 2aad |
| **Adeegyada maaliyadeed ee elektrooniga ah/digital** | • Dejinta siyaasad ku saabsan adeegyada maaliyadeed ee elketrooniga ah, oo ay ku jirto isku-xirnaanta /isku-shaqaynta ka dhaxaysa shabakaaha isgaarsiinta | • Sanadka 1aad |
| **Dhowrista Macmiilka** | • Dejinta siyaasadda dhowrista macmiilka iyo carruurta | • Sanadka 2aad |
| **Ballaarinta iyo Sii wanaajinta kaabayaasha ICT-ga** | • Khariidadaynta kaabayaasha jira ama qorshaysan ee fiberka ama utitlity-ga taban - waddooyinka, shabakadda korontada, taawarrada, dhuumaha iwm<br>• Qaadashada nidaaminta hal-mar-qod (shardiga in godadka lagu daro dhammaan waddooyinka cusub marka ay suurtogal tahay iyo ogolaanshaha in dhinacyo saddexaad ay adeegsan karaan kaabayaasha masaafada dheer ee ay dhigeen shirkadaha isgaarsiintu)<br>• Qaadashada hagayaasha wadaagista togan iyo ta taban ee kaabayaasha ee dhammaan ISP-yada iyo shirkadaha isgaarsiinta si loo saamaxo goob-wadaagga qalabka. | • Sanadka 2aad<br>• Sanadka 1aad<br>• Sanadka1. 5 |

| | | |
|---|---|---|
| | • Qeexidda shuruudahaa Xuquuqda Maritaanka ee dhulka guud<br>• Dhammaystirka hirgelinta barnaamijyada kaabayaasha ee muhiimka ah (shabakadda qaranka ee lafdhabarta ah ee dhulka marta, iwm)<br>• Yagleelista maamulka wax ku oolka ah ee IXP, .so ccTLD, adeegyada la wadaago (caching; rootsDNS, iwm) | • **Sanadka 1aad**<br>• **Sanadka 5aad**<br>• **Sanadka1** |
| **Helitaanka iyo adeegsiga Broadbandka- Hiigsiyada Bilowga ah** | • Isla qaadashada hiigsiyada ku saabsan daboolista iyo jabnaanta qaadweynta sida ka Guddida Qaadweynta ee ah 1GB oo internet moobil ah in lagu helayo 2% celceliska dakhliga billeha ah.<br>• Xaqiijinta hiigisyada jabnaanta qaadweynta taleefanka gacanta laba sanadood: 15% dadka Somaliya inay si joogto ah u adeegsadaan adeegyada qaadweynta 3G iyo wax ka sarreeya.<br>• 5 sanadood: 35% bulshadu si joogto ah u hesho una adeegsato qaadweynta mobilka (3G iyo wax ka sarreeya)<br>• Xawaaraha adeegyada sugan iyo kuwa gacanta ee hay'adaha dowladda, waaxda gaarka ah iyo dadweynuhu inay ku filan yihiin daboolista baahiyahooda dirista data-da oo dhakhso ah oo wax ku ool ah. | • **Sanadka1 1aad**<br>• **Sanadka 1aad**<br>• **Sanadka 5aad**<br>• **Sanadka 3aad** |
| **Maaraynta jeegaanta** | • Dejinta qorshaha 5ta sanadood ee maamulka jeegaanta, daabicidda waajibaadka.<br>• Dhiska karaanka NCA-ga ee maamulka jeegaanta, dejinta siyaasado dhiirigeliya adeeg gaarsiinta dhulka miyiga ah, iyo nidaaminta qoondooyinka jeegaanta.<br>• Bilowga hannaan cusub oo jeegaanta lagu bixiyo si waafaqsan xeer-nidaamiyayaasha ITU ee horumarinta 4G/5G, adeegyada dayax-gacmeeka iyo adeegyada aan xariga lahayn ee hirarka ku cabiran milimetre-ka, iyo tiknoolajiyadaha cusub ee jeegaan wadaagga, HAPs, kooxaha dayax gacmeedyada wareegga hooseeya (LEO) | • **Sanadka 2aad**<br>• **Sanadka 2aad**<br>• **Sanadka 2aad** |

| | | |
|---|---|---|
| **Helitaanka Dadka oo Dhan** | • Dejinta istiraatiijiyada lagu gaaraya Yoolka Dadka oo Dhan Helaan Adeega, oo ay ku jiraan hiigsiyada heerarka adeegsiga kooxaha la faquuqo.<br>• Hirgelitna Istiraatiijiyadda Galaangalka Dadka oo Dhan.<br>• Soomaalida oo dhami inay helaan adeegyo la jari karo oo cod iyo internet oo waddani ah. | • **Sanadka 2aad**<br>• **Sanadka 3aad**<br>• **Sanadka 5aad** |
| **Waxbarashada** | • Xisaabin/khariidadayn dhammaystiran lagu sameeyo galaangalka internetka ee dugsiyada (iyo nooca galaangalka)<br>• Internet laga helo dhammaan dugsiyada sare.<br>• Dhamaan dugsiyada sare ay bixiyaan ugu yaraan hal koorso oo ku saabsan ICT.<br>• Hay'adaha waxbarashada heerka saddexaad ay bixiyaan shahaadooyin ICT.<br>• Dhammaan barayaasha dugsiyada sare in lagu tabobaro adeegsiga ICT ee waxbarashada | • **Sanadka 1aad**<br>• **Sanadka 3aad**<br>• **Sanadka 4aad**<br>• **Sanadka 3aad**<br>• **Sanadka 2aad** |
| **Hal-abuurka, Wershadaha, Beeraha iyo Aqoon-baarista** | • Koobista barnaamijyada dowladda, gaarka ah ama kuwa kale ee la taageero ee boorriya hal-abuurka iyo cilmi baadhista.<br>• Horumarinta maalgelinta iyo taageerista dowladeed iyo gaar ahaaneed ee Shabakadda Cilmibaarista iyo Waxbarashada ee Qaranka (SomaliRen/ National Research and Education Network).<br>• Yagleelista barnaamij taageero oo ku aaddan howlgallada hal-abuurka baritilmaamsan , gaar ahaan beeraha iyo Internetka Ashyaada guud ahaan. | • **Sanadka 1aad**<br>• **Sanadka 1aad**<br>• **Sanadka** |
| **Caafimaadka iyo ICT-ga** | • 100% cisbitaallada iyo goobaha caafimaadku inay helaan internet.<br>• Qorshaha caafimaadka elektrooniga ah oo dejisan, oo ay ku jirto Nidaamka Xogta Caafimaadka ee Qaranka oo shaqaynaya. | • **Sanadka 3aad**<br>• **Sanadka 2aad** |
| **Hay'adaha Dowladda** | • Dhammaan wasaaradaha FGS iyo dowlad goboleedyadu inay helaan internet.<br>• Dhammaan hay'adaha hoose ee FGS iyo dowlad goboleedyadu inay helaan internet. | |

| | | |
|---|---|---|
| | • Dhammaan wasaaradaha FGS iyo dowlad goboleedyadu inay helaan internet. | • Sanadka 1aad |
| | • Dhammaan hay'adaha hoose ee FGS iyo dowlad goboleedyadu inay helaan internet. | • Sanadka 3aad |
| | • Dhammaan xarumaha booliska ee FGS iyo FMS inay helaan internet. | • Sanadka 3aad |
| | • Dhammaan saldhigyada soohdimuhu inay helaan internet. | • Sanadka 3aad |
| | • Dhammaan laamaha boostadu inay helaan internet iyo nidaamka cinwaanaynta qaranka (NAS). | • Sanadka 3aad |
| | • Halbeeg la wadaago iyo galaangal loo leeyahay barnaamijka samaynta degelka internet ee dhammaan wasaaradaha. | • Sanadka 2aad |
| | • Ardaa (portal) dowladeed oo internetka ah oo dadweynuhu ka helaan. adeegyada | • Sanadka 2aad |
| | • Qorshe adkaysi, siyaasad dayactir, iyo nidaam maamul hantiyeed oo dowladda oo dhan ah oo jira. | • Sanadka 2aad |
| | • Soo-saarista nidaamka kaarka aqoonsiga muwaadinka. | • Sanadka 3aad |

# 5.0 QAABDHISMEEDYADA IYO MAS'UULIYAADKA HAY'ADEED

Hay'adaha dowladda iyo daneeyayaasha oo dhami inay fahan ka wada qaataan doorarka mid kasta leedahay iyo sida Siyaasaddu u taageerayso hirgelinta qorshayaashooda hay'adeed, waxa ay muhiim u tahay helidda taageerada iyo ka qaybgalka dhammaan hay'adahaas. Qaybtani waxa ay faahfaahinaysaa dooraarkaas iyo mas'uuliyadahaas. Haddaba, doorarka waaweeyn ee dowladdu ka qaadanayso waaxda ICT-gu waa:

- Hogaanka istiraatiijiga ah iyo isku-duwista dhiirigelinta adeegsiga ICT-ga.
- Hubinta in uu jiro deegaan awoodsiinaysa horumarinta kaabayaasha ICT-ga.
- Taageeridda dedaalka lagu hubinayo in dadka oo dhami ay heli karaan galaangalka internetka oo jaban.
- Taageerista adeegsiga dowladda ee ICT-ga, ha loo adeegsado maamulka gudaha ama mucaamalaadka ay la samaynayo dadweynaha iyo ganacsiyada.

## 5.1 WASAARADDA BOOSTADA, ISGAARSIINTA IYO TIKNOOLAJIYADDA (MPTT)

Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta iyo Tiknoolajiyaddu (MPTT) waxa ay dejisaa ajendaha siyaasadda waaxda, waxa ay isku-xirtaa hay'adaha kale ee dowladda, waaxda gaarka ah, ururrada bulshada rayidka ah iyo daneeyayaasha kale, iyada oo dadka kala tashanaysa dejinta siyaasadaha iyo istiraatijiyadaha waaxda. Wasaaraddu waa madaxa waaxda, waxayna hubinaysaa daahfurnaanta, madaxbannaanida iyo nidaaminta wax ku oolka ah ee waaxda, waxa ayna Dowladda Federaalka ee Soomaaliya kala talinaysaa  arrimaha ICT-ga, waxayna sida oo kale ku metalaysaa dowladda shirarka caalamiga ah ee lagu falanqaynayo siyaasadda ICT-ga.

Marka la eego muhimadda weyn iyo doorka isu-tallaabsan ee ICT-ga, waxaa lagama maarmaan ah in hoggaanku noqdo halka ugu sarraysa ee heerka fulinta, oo ay hagaan wasiiradda iyo wakiiladda dhammaan wasaaradaha daneeyayaasha ka ah iyo Dowlad Goboleedyada ka tirsan Federaalka. Arrinkani waxa uu qaadan karaa qaabka in la magacaabo jago fulineed oo ka tirsan MPTT, si ay u hoggaamiso koox shaqeed ICT oo ka kala socda hayadaha kala duwan, si ay u kalkaaliyaan isku-dubaridka iyo wadaagga hantida ee arrimaha horumarinta ICT-ga ee hay'ad kasta. Masuuliyaddooda waxaa sida oo kale kamid ah la shaqaynta Qorshaha Istiraatiijiga ah ee Kaabayaasha ee Soomaaliya, koox-shaqeedku waxa ay kaashan kartaa khibrad dibadeed marka loo baahdo.

## 5.2 HAY'ADDA ISGAARSIINTA QARANKA (NCA)

Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (NCA) waa hay'adda nidaamineed ee waaxda ICT-ga. Iyada oo uu aasaaasay Sharciga Isgaarssiinta 2018, masuuliyadeeda koowaad waa fulinta siyaasadaha Dowladda Federaalka Soomaaliya ee waaxdan khuseeya. Waxaa laga doonayaa inay dejiso Xeer-nidaamiyaayaal, Amarro, Hagayaal iyo Xeerar waaxda ku maamula fulinta siyaasadaha ICT-ga ee qaranka. Sharciga Isgaarsiintu si qayaxan uma sheegayo nidaaminta waaxda boostada. Taas waxaa ka dhashay inaan waaxdaasi lahayn nidaamiye, in kasta oo arrinkan lagu eegi doono wax ka bedellada mustaqbalka.

### MAS'UULIYAADKA NCA EE HAATAN WAA INAY:

- Samayso nidaaminta iyo rukhsad bixinta waaxda oo daahfuran, madaxbannaan oo wax ku ool ah.
- Hubinta in waaxda laga helo adeegyada xiriirka oo la jari karo.
- Dhowrista xuquuqda macmiilka/muwaadinka iyo dhiirigelinta tartanka.
- Hubinta caddaaladda tartanka ka jira waaxda, habraacyada rukhsadaynta oo dhakhsiyo ah, iyo hoos u dhigidda caqabadaha soo gelista suuqa bixinta adeegyada xiriirka.
- Boorrinta iyo dhiirigelinta maalgashiga waaxda.
- Qeexista agabka  ugu muhiimsan iyo nidaaminta adeegsigooda.
- Suurtogelinta isku-xirnaanta, goob-wadaagga iyo wadaagista kaabayaasha.
- Bixinta maamul wax ku ool ah oo horusocod leh oo ku saabsan maaraynta jeegaanta raadiyaha oo waafaqsan hagayaasha ITU.
- Ogolaashanaha qaadashada lambarrada taleefannada gacanta.
- Ka la talinta MPTT xeer u hoggaasanka shirkadaha isgaarsiinta, siyaasadaha cusub iyo istiraatiijiyadaha galaangalka dadka oo dhan.
- Maamulidda iyo dhiirigelinta adeegsiga sumada dalka ee .So ee ugu dambaysa magaca degelka internetka (top Level Domain) (ccTLD)
- Hubinta in qalabka ICT-ga ee dalka la keenayo in uu buuxinayo halbeegyada caalamiga ah.
- Kaydinta iyo daabicidda joogtada ah ee tirakoobyada ICT-ga iyo bixinta gorfayn suuq iyo farsamo oo taageerta siyaasad dejinta.
- Qeexidda halbeegyada tayada adeegga iyo hubinta in loo hogaansamo.
- Ku metelidda Dowladda Soomaaliya golayaasha heer goobol iyo caalami ee la xiriira nidaaminta ICT-ga.

## 5.3 ADEEG-BIXIYAYAASHA ISGAARSIINTA/INTERNETKA EE MAXALIGA AH

Waxaa soo hoos gelaya shirkadaha maamula shabakadaha isgaarsiinta ee sugan iyo kuwa gacanta iyo shirkadaha ka ganacsada bixinta adeegyada internetka (ISP). Waxaa la filayaa suuqa in ay shirkado cusubi soo galaan, oo ay ku jiraan shirkadaha maamula xarunta data-da, shirkadaha maamula shabakadaha fibre-ka ee magaalooyinka, iyo shuraako dowlad iyo ganacsi gaar ah (PPP) oo qaab jumlad ah ku bixiya adeegga kaabayaasha galaangalka oo furan.

## 5.4 BAAHIYAYAASHA

Baahiyayaasha dowladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay waxa ay dadweynaha siiyaan adeegyada idaacadaha iyo telefishanka, marka la eego is-dhexgalka waaxda ICT-ga, baahiyayaashu waxay ka ag dhowyihiin bixinta muxtawaha, taas oo iyana dhankeeda xiriir dhow la leh warbaahinta iyo saxaafadda. Tani waxa ay waaxda hoos keentaa korjoogista Wasaaradda Warfaafinta, halka ay ka hoos iman lahayd MPTT oo leh door farsamo oo la xiriira maamulka jeegaanta iyo tartanka baahiyayaasha iyo shirkadaha isgaarsiinta ee ku aaddan khayraadkan. Nasiib wanaag, Soomaaliya waxa ay ka faa’idaysan kartaa hayaanka haatan horumarka fiican sameeyay ee caalamku kaga guurayso nidaamka analog-ga (analogue) ee loo guurayo habka digitalka ah, taas oo sii kordhinaysa wax ku oolnimada adeegsiga jeegaanta baahinta. Intaas waxaa dheer in in adeegsiga farsamooyinka cusub ee wadaagista jeegaanta ee ku salaysan raadiyowga uu xaddidayo barnaamijka /softwareku ( SDR).Tani waxay ka dhigan tahay in mustaqbalka aan la isku qabsan doonin jeegaanta.

## 5.5 WASAARADAHA IYO WAKAALADAHA KALE EE DOWLADDA

Sababta oo ah dabeecadda ICT-ga ee isaga gudubka mowduucyada, waxaa la filayaa dhammaan wasaaradaha iyo wakaalda dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyadu in ay door ku yeelan doonaan sidii faa’idada ugu badan looga samayn lahaa karaanka ICT-ga. Si loo hubiyo in si buuxda loo wada shaqaynayo oo horumar la samanayo, waxaa loo baahanayaa in la yagleelo unug dowladeed oo isku-dubarida howlaha hay’adaha kala duwan ee dowladda, si uu u la socdo horumarka, waxna uga qabato caqabadaha laga yaabo inay soo baxaan inta lagu gudo jiro fulinta siyaasadda.

Horumarinta shabakadda lafdhabarta waxaa la xiriira in MPTT ay la shaqaynayso wasaaradaha gaadiidka iyo tamarta, iyo NCA, iyo shirkadaha isgaarsiinta si loo hubiyo goob-wadaagga xarkaha fibre ka iyo waddooyinka cusub iyo kuwa la hagaajinayo, xarkaha dabka iyo kaabayaasha kale ee taban, iyo yaraynta caqabadaha hor istaagi kara helitaanka Xuquuqda Maritaanka. Intaas waxaa dheer, waxaa fursado loo raadinayaa in la isku-xiro horumaritna kaabayaasha iyo yagleelista laamaha boostada ee Postada Soomaaliyaa.

## 5.6 SHIRKADAHA ICTGA EE WADDANIGA AH

Waxaa sida oo kale waaxda kamid ah shirkadaha gaarka ah ee ICT-ga ee ka howlgala Somaaliya ee bixiya adeegyada shaqaalaha, barnaamijyada (software) iyo qalabka elektrooniga ah (hardware) iyo adeegyada kale. Shirkadahani door muhiim ah ayay ka ciyaaraan in shirkadaha isgaariinta, baahiyayaasha iyo ganacsiyadu helaan adeegyada IT-ga, iyo in ay dadweynuhu helaan qalabka elektrooniga ee guryaha, iyo sida oo kale adeegyada takhasuska ah ee sida dhisidda ardaayada, maaraynta degellada internetka, abuurista muxtawaha waddaniga ah, iyo bixinta khibradda dhismaha shabakadaha iyo adeegyada martigelinta.

## 5.7 HAY'ADO KALE

Waxaa muhiim ah in la ogaado in hay'ado kale/daneeyayaal kale iyaguna la ma huraan u yiiin taageerista iyo hirgelinta wax ku oolka ah ee Siyaasadda. Waxaa kamid ah:

- Mudanayaasha baarlamaanka
- Bahwadaagta Horumarka
- Ururrada Bulshada
- Hay'adaha Warbaahinta.

## 5.8 SOO KOOBISTA QORSHAYAASHA/HABAYNTA MUHIIMKA AH EE HAY'ADAHA

- MPTTT, oo ah wasaaradda igmashada ugu weyn u haysata kormeerka kaabayaasha isgaarsiinta, siyaasadda xogta, tiknoolajiyadda xiriirka, kaabayaasha baahinta (taawarrada iyo jeegaanta), iyo adeegyada boostada.
- Mas'uul ICT oo xafiis ku leh Xafiiska Ra'iisla Wasaaraha oo taageero ka helaya koox howled laga soo xulay hay'ado kala duwan oo ah wakillada ICT-ga ee hay'ad kasta oo dowladeed.
- NCA waa nidaamiyaha ICT-ga oo mas'uul ka ah isgaarsiinta, baahinta, rakaadka raadiyaha,  iyo adeegyada boostada.
- Waaxda ICT-ga ee MPTT waxa ay masuul ka tahay in dowladdu ku xirnaanto internetka iyo adeegyada internetka ee dowladda, xarunta data-da qaranka, iyo sidoo kale halbeegyada iyo istiraatiijiyadda siyaasadda xogta dowladda iyo horumarinta/dhisidda barnaamijyada.
- Koox hay'ado kala duwan ka socda oo ka shaqeeya isku-duwista kaabayaasha, oo ay qayb kuaaihiin Maamulka Gobolka Banaadir iyo Wasaaradda Howlaha Guud ayaa isku dubaridaysa howlaha guud, si la isula ogolaado halbeegyada, iyo hubinta in kaabayaasha ICT- ga lagu daro jidadka oo dhan (kuwa hore u jiray, kuwa dib loo qaabaynayo, iyo kuwa cusub), khadka tareenka, khadadka korontada, iwm.
- Postada Soomaaliya – howlgelinta boostada qaranka.

## 6.0. DHINACYADA SIYAASADDU AWOODDA SAARAYSO

### 6.1 QAAB-DHISMEEDYADA SHARCI IYO NIDAAMIN

Haatan, galdaloollo ayaa ka jira taageerada sharci iyo nidaamineed ee waaxda ICT-ga, taas oo Siyaasaddani doonayso in ay wax ka qabato. Siyaasaddu waxa ay qeexaysaa qaab-dhismeedka sharci ee qaybaha kala duwan ee dhinacyada kala duwan ee ICT-ga Soomaaliya ay ku shaqeeyaan, taas oo ay barbar socdaan xeer-nidaamiyayaasha hore u jiray ee ku saabsan dhinacyada kala duwan ee waaxda ICT-ga iyo guud ahaan howlaha ganacsi.

Howlahaasi si wax ku ool ah si ay ugu fulaan, waxaa laga maarmaan ah in qaab-dhismeedka sharci uu waafaqsan yahay baahiyaha ganacsiga xogta ku salaysan iyo hab-dhaqannada toolmoon ee caalamiga ah ee kasloonida ku abuura dhammaan daneeyayaasha waaxda. Si taas loo helo, hay'adda nidaaminta ICT-ga ee NCA waxa ay beegsanaysaa inay hubiso kalsoonida lagu qabo inay tahay mid madaxbannaan, waxtar leh, daahfuran oo caddaali ah marka ay gudanayso howlaheeda hubinta u hoggaansanka axkaamta sharciga ah iyo habdhaqannada ay dhigayaan xeer-nidaamiyayaashu.

#### 6.1.1 UJEEDDOOYINKA SIYAASADDA

- In dadka oo idil ay helaan adeegyo isgaarsiin cod, qaadweyn iyo boosto, oo lagu helayo heer tayo oo u dhigma halbeegyada caalamka.
- In kaabayaasha ICT-ga ee xasaasiga ah si fiicaan u dhowrsan yihiin, iyo in ay diyaar yihiin tallaabooyin falcelin oo ka jawaaba arrimaha amniga internetka iyo musiibooyinka jireed.
- Daah-furnaan, kalsooni iyo isku-xirnaan ka dhaxeeya dhammaan shabakadaha dadweynaha/guud iyo barnaamijyada lacag-bixinta elektrooniga ah ee kala duwan.
- In muwaadiniintu ay si wanaagsan u dhowran yihiin oo ay kalsooni ku qabaan adeegsiga shabakadaha iyo adeegyada guud, taas oo ay taageerayso siyaasado dhowrsanaan iyo xeer-nidaamiyaayaal ku saabsan guud ahaan dhowrista xogta, xorriyadda helitaanka xogta iyo xorriyadda hadalka.

### 6.1.2 ISTIRAATIIJIYADO

- Dib u eegista, iyo suurtogaleinta, iyo marka loo baahdo, wax ka bedelka xeerarka jiray ama ansixinta xeerar cusub oo sare u qaadaya horumarinta waaxda ICT-ga.
- Hubinta in sharci ahaan ay dhowran yihiin kaabayaasha jireed ee ICT-gu, iyo inay jiraan tallaabooyinka sugidda ammaanka internetka.
- Yaraynta culayska nidaamineed ee saran waaxda ganacsiga gaarka ah, iyada oo la adeegsanayo nidaamin gacan dhibirsan oo xoogga saaraysa adeegsadaha, si loo boorriyo hal-abuurka, loona dhiirigeliyo qulqulka xorta ah ee xogta, iyada oo isla markaasna la hubinayo inay jiraan xaddidayaasha iyo isudheelitirka hubinaya dhowrista dadweyanha, caddaaladda suuqa iyo raandhiisnimada/ku-tiirsanaanta adeegyada.
- Waafajinta axkaamta sharciga ah baahiyaha dhaqaalaha ku salaysan xogta iyo habraacyada caadiga ka ah caalamka.
- Hubinta dhowrista muwaadinka iyo daahfurnaanta waaxda, taas oo ay ku jiraan nidaamyada lacag-bixnta elektrooniga ah, nidaamyada xogta dowladda, baraha bulshada iyo barnaamijyada kale ee elketrooniga ah.
- Tabobar farsamo in la siiyo dadka mas'uulka ka ah hirgelinta Siyaasadda.

## 6.2 KAABAYAASHA ICT-GA

Waxaa khasab ah in ay Somaaliya hesho kaabayaal ICT oo la jari karo oo meel kasta laga heli karo, si loo taageero yoolasha horumarinta qaranka iyo la tartanka caalamka. Si wax looga taro  yaraanta iyo badnaanta kharashka kaabayasha ICT-ga  Soomaaliya, Siyaasaddu waxa ay awoodda saaraysaa dhinacyada soo socda ee kaabayaasha:

- Fudaydinta iyo taageeridda horumarinta kaabayaal isgaarsiinta oo heer qaran ah oo wax ku ool iyo ammaan ba ah, kaas oo laga helo xiriir qaadweyn oo jaban, meel kastana laga heli karo, dedejiyana horumarka dhaqan-dhaqaale ee dhammaan qaybaha Soomaaliya.
- Hubinta in dhammaan shirkadaha isgaarsiintu ay galaangal u leeyihiin b) xarkaha fibre-ka ee isku xira magaalooyinka waaweyn oo dhan, t) xiriiro dhowr ah oo ku xiran shabakadaha lafdhabarta ah ee gobolka iyo caalamka, j) baro isku-xirnaan maxalli ah oo wax ku ool ah, kh) istiraatiijiyad dadka oo dhami ku helayaan xiriir, taas oo taageeraysa bixinta adeegga galaangalka deegaannada aan helin adeeg ku filan.

### 6.2.1 SHABAKADAHA LAFDHABARTA CAALAMIGA AH IYO DALKA

Si loo hubiyo in ay Soomaaliya hesho xiriir gaarsiisan heer qaran iyo heer caalami, xarun kasta oo taleefan gacmeed waa inay ku xirnaataa shabakad lafdhabar ah oo la isku hallayn karo, taas oo galaangal u leh ugu yaraan laba xiriir sare oo kala madaxbannaan. Tani waxa ay u baahan tahay shabakad lafdhabar ah oo waddani ah oo meel kasta marta oo isku noqnoqonaysa, oo ku xiran xarkaha maraa badda hoosteeda ee caalamiga ah iyo xarkaha heerka caalami ee soohdimaha Soomaaliya laga heli karo.

Kaabahan waa in dhammaan shirkadaha ka ganacsada isgaarsiintu ku helaan nidaam wareejineed (jumlad), oo ay garab socdaan heshiisyo isku-xirnaan oo caddaalad iyo wax ku ool ah, iyo kharashaadka baaxadda oo lagu dhimay xeer-nidaamiyayaasha wadaagista kaabayaasha iyo siyaasadaha hal-mar-qod (hoos ka eeg).

Waxaa loo baahan karaa yagleelista shuraako dowladda iyo ganacsi gaar ah (PPT) oo maamula kaabayaasha lafdhabarta ah ee cusub haddii loo baahdo, iyada oo isla markaasna laga faa'idaysanayo hantida sii jirtay ee shirkadaha isgaarsiinta ee gaarka ah iyo hantida dowladda ee jidadka iyada oo la adeegsanayo siyaasadaha hal-mar-qod.

### 6.2.2 XALALKA XIRIIRRADA MAYLKA UGU DANBEEYA EE SUGAN IYO KUWA GACANTA

Marka laga yimaaddo kobaca dalabka qaadweynta taleefanka gacanta, waxaa jira baahida isa soo taraysa ee internetka aan mitirsanayn ee guryaha, ganacsiyada iyo goobaha kale ee dalka oo dhan. In la dhiso shabakad lafdhabar ah oo fibre ah iyadu keligeed ma xallinayso baahiyahan. Waxaa loo baahanayaa in la kaashado shirkadaha korontada, jidadka iyo biyahaa ee magaalooyinka iyo dowladaha hoose si adeegsadaha ugu danbeeya loogu gaarsiiyo sicir uu jari karo xiriir fibre ama xarig la'aan ah oo awood badan. Habraacyada ogolaansho bixinta iyo rukhsadaha ee heerka hoose ee dowladda ayaa laga yaabaa inay u baahdaan in la fudaydiyo oo lagu saleeyo kharashka.

### 6.2.3 MAAMULKA JEEGAANTA RAADIYAHA

Iyada oo la eegayo muhiimadda weyn ee tiknoolajiyadaha xarigga la' (wireless) ay u leeyihiin bixinta adeegga internetka ee adeegsadaha ugu danbe, waxaa lama huraan ah maamulka wax ku oolka ah ee jeegaanta, si loogu adeegsado meel-marinta istiraatiijiyadda ICT-ga Soomaaliya ee ah taageerista yoolasha horumarineed ee dalka. Maamulka jeegaanta waxaa loo marayaa qaab horusocod ah, daahfuran oo ku salaysan caddaymaha, taas oo hagaysa qoondaynta iyo bixinta jeegaanta iyo la socoshada adeegsigeeda.

Mawjado in loo qoondeeyo shabakadaha qaadweynta ee moobilka ee ka imanaysa hayaanka baahinta telefishanku ugu guurayo habka digitalka ah, waxa ay wax ka taraysaa adeegsiga wax ku ool ka ah ee jeegaanta qaranka. Sida oo kale waxaa la raadinayaa istiraatiijiyadaha lagaga faa'idaysanayo habka wadaagista jeegaanta, ka dhaafista rukhsadda iyo qoondaynta jeegaanta ee deenaamika ah ee ku salaysan awoodaha barnaamijyada qeexitaanka raadiyowga.

### 6.2.4 FUDAYDINTA HELIDDA XAQQA SII-MARIDDA.

Intaas waxaa dheer in wax laga bedelo habraacyada ogolaanshaha ee dowladaha hoose, si loo dhexgeliyo mabaadi'da hal-mar-qod, taas oo suurtogelinaysa in dhammaan kaabayaasha kale iyo dhismayaasha guud ay leeyihiin hogagga loogu talogalay galaangalka broadband.Si loo taageero horumarinta kaabayaasha masaafada dhow iyo ta fog, waa in shirkadaha isgaarsiinta iyo wakiiladoodu dhakhso u helaan xaqqa adeegsiga dhulka guud, si ay xiriirka u gaarsiiyaan dadweynaha, iyada oo lacagta laga qaadayona lagu salaynayo kharashka. Siyaasaddu waxa ay dadka leh dhulka gaarka ah, dowladaha hoose, iyo dhinacyada kale ee leh dhulka guud, iyo hay'adaha kaabayaasha ku dhiirigelinaysaa inay shirkadaha isgaarsiinta kala shaqeeyaan fudaydinta dhiska taawarrada iyo dhigista xarka fibreka ee dhulkooda. Waxaa loo baahan yahay in la jaangooyo aagaynta taawarrada iyo helitaanka degdeg ah ee xaqqa sii marka dhulka guud (ROW), sida oo kale waa in la dejiyaa halbeegyada iyo habraaca ka warbixinta ROW.

### 6.2.5 KA FAA'IDAYSIGA KAABAYAASHA AAN FIRFIRCOONAYN

Baahinta shabakadaha dhaw iyo kuwa masaafada dheeriba waxa ay ka faa'idaysan karaan isku-darista howlaha dhiska shabakadaha fibre-ka iyo dhismaha kaabayaasha kale ee dhulka mara sida jidadka, khadadka tareennada, korontada iyo dhuumaha. Tan oo ay garab socoto siyaasadaha hal-mor-qod ayaa loo baahan yahay si loo dhimo kharashka gaarista daboolista adeegga ee la doonayo.

Koox Howleed Kaabayaal oo ay ka tirsan yihiin dhammaan hay'adaha dowladda ayaa loo baahan yahay inay isku-dubaridaan barnaamijyada dhismaha ee rayidka ah sida jidadka, khadadka tareenka, beebabka korontada iyo biyaha, iyo xarkaha hawada mara si loo hubiyo in dhammaan kaabayaaha cusubi ay leeyihiin hogag iyo/ama taawarro, iyo in la buuxiyay halbeegyada ku munaasibka ah marka la adeegsanayo. Sida oo kale waxaa la dejinayaa hab jaan-goynaya qiimayaasha macquulka ah ee adeegsiga kaabayaasha aan firfircoonayn, sidoo kalena taageera dayactirka kaabayaashaas.

Maadaama oo dhismaha rayidka ahi uu qayb weyn ka yahay kharashka dhigista xarkaha fiberka, in hogagga xarkaha lagu daro naqshadda dhismayaasha cusub sida waddooyinka iyo mashaariicda tamartu, waxay noqonaysaa kharash dheeraad ah oo micne weyn aan lahayn. Iskaashiga wasaaradaha ay khuseyso arrintani waxa ay hubinaysaa in kharashka isgaarsiinta ama hogga guud ee adeegsiga (utility duct) lagu daro dhammaan dhismayaasha guud ee cusub.

Intaas waxaa dheer in wax laga bedelo habraacyada ogolaanshaha ee dowladaha hoose, si loo dhexgeliyo mabaadi'da hal-mar-qod, taas oo suurtogelinaysa in dhammaan kaabayaasha kale iyo dhismayaasha guud ay leeyihiin hogagga loogu talogalay galaangalka broadband.

### 6.2.6 WADAAGISTA TAAWARKA IYO GOOB-WADAAAGGA

Marka ay farsamo ahaan suurtogal tahay, shirkadaha isgaarsiinta waxaa lagu dhiirigelinayaa taawarradoodu ay wadaagaan goobaha iyo agabka kale. Tani waxay suurtogelinaysaa in aan la iska dhisin xiriirka xarkaha la' iyo taawarrada baahinta, khayraadka dhifta ahna in sida ugu fiican looga faa'idaysto, iyada oo isla markaasna la dhimayo saamaynta deegaaneed iyo kharashka howlgelinta. Wadaagista galaangalka taawarrada iyo kaabayaasha la xiriira (tamarta, ammaanka) waa in laga bixiyaa tacriifad ku habboon..

Hagayaal ayaa loo baahan yahay in la dejiyo iyada oo ay kawada shaqaynaso wasaaradaha uu khuseeyo arrinkani, NCA, dowladaha hoose iyo maamulayaasha/milkiilayaasha taawarrada iyo dhismayaasha. Hagayaashu sida oo kale waxay jaangoynayaan dhererka taawarrada, u dhawaanshaha dhismayaasha xasaasiga ah (sida dugsiyada, cisbitaallada), goob-wadaagga, iyo habka ka saarista shaqada.

### 6.2.7 AMMAANKA IYO KU-TIIRSANAANTA KAABAYAASHA MUHIIMKA AH EE ICT-GA

Waa in la dejiyaa halbeegyada qodista hogagga iyo dhigista xarkaha fiberka si loo hubiyo hufnaanta iyo ku tiirsanaanta kaabayaasha. Tani waxay u baahan tahay in lagu xoojiyo dhowris sharci oo ku filan oo ka ilaalinaysa xatooyada iyo burburinta.

Waxaa sida oo kale lagama maarmaan ah in si la isku hallayn karo loo maamulo Baraha Isweydaarsiga Internetka (IXPs), maadaama oo ay yihiin qayb muhiim oo ka tirsan kaabayasha lama huranaka ah, sababata oo ah wax ay hubiyaan in dhaqdhaqaaqa dalku uu ku koobnaado dalka, iyo in mar walba hilinno/marinno bedel ahi ay dhaqdhaqaaqa u furan yihiin.

### 6.2.8 XARUNTA XOGTA EE DOWLADDA

Xarun xogeed dawladdu leedahay ayaa la samaynayaa si meel la isugu geeyo adeegyada, barnaamijyada iyo kaabayaasha uu u baahan yahay adeeg bixinta hay'adaha dowladda ee wax ku ool ah, ha noqoto adeeg dowlad iyo dowlad (G2G), dowlad iyo ganacsi (G2B), iyo dowlad iyo muwaadin (G2C), iyada oo la adeegsanayo ardaa ay wadaagaan oo lagu taageerayo kaabayaal xiriir oo jowhari ah, iyo istiraatiijiyadda maamulka xogta ee dowladda.

Dhankan marka la eego, xarunta xogtu waa in ay dabooshaa baahiyo dhowr ah, oo ay kamid yihiin noqoshada kayd dhexe oo lagu ururiyo xogta qaranka, kayd xogeed ammaan ah, adeeg bixin internetka ah, ardaa adeeg muwaadin, martigelinta degellada hayadaha dowladda, iyo shabakad dowladeed iyo barnaamij kasoo kabasho musiibo iyada oo adeegsanaysa goob kale oo ah kaydin (back-up).

### 6.2.9 KAABAYASHA NIDAAMKA MAALIYADEED

Si loo hubiyo in Soomaalida oo dhami ay noqdaan shabakad muwaadiniin oo dhammaystiran, waxay u baahan yihiin inay helaan xarun data- oo isku xir (carrier-neutral) oo la jari karo, iyo In iyo lacag dirid isku-xiran iyo barnaamijyo lacag bixin elektroonig ah. Tani lyana waxay u baahan tahay in la cusboonaysiiyo xeer-nidaamiyayaasha bangiyada iyo adeegyada maaliyadeed ee moobilka, si loo hubiyo in waaxdu u hogaansanaato habdhaqannada suuban ee caalamiga ah. Waxaa loo baahan yahay adeegyo maaliyadeed ee digital ah iyo siyaasadaha adeegsigooda si loo hubiyo in dhammaan muwaadiniintu ay qayb ka yihiin waaxda maaliyadeed.

### 6.2.10 ISTIRAATIIJIYADAHA TAAGEERAYA

- Hindisidda nidaam xog-maamul iyo go'aan taageeris oo guud, kaas oo khariirad u sameeya dhammaan goobaha kaabayaasha. Waxaa sida oo kale loo baahanayaa habraacyo in loo sameeyo in gudbinta xogtu ay ku baxdo wakhti ku habboon.

- Hormuud ka noqoshada adeegsiga iyo daabulista ilaha tamarta ee la isku hallayn karo ee muhiimka u ah waaxda ICT-ga.

### 6.3 HELITAANKA DADKA OO DHAN EE ADEEGYADA CODKA IYO INTERNETKA QAADWEYNTA

Jaritaan la'aanta iyo gaarista adeegga ee kooban ayaa ah caqabadaha ugu waaweyn ee adeegsiga dadka ee adeegyada ICT-ga. Si loo taageero in qof kasta oo jooga Soomaaliya uu galaangal la jari karo u helo ICT-ga, waxaan laga maarmaynin in si laxaad leh loo dhimo kharashka helitaanka iyo in la kordhiyo gaarista adeegga. Tani waxa ay u baahan tahay in kordhiyo tartanka ka jira waaxda isgaarsiinta, oo ay wehelisto wadaagista kaabayaasha si hoos loogu dhigo sicirka, oo ay taageerayso iskaashiga dowladda iyo ganacsiga gaarka ah ee lagu maalgelinayo sidii shabakadda loo gaarsiin lahaa deegaannada durugsan iyo kuwa aan helin adeegga ku filan. Waxaa taas dheer in fiiro gaar loo yeesho kooxaha nugul iyo kuwa laga fursadaha wanaagsan yahay sida dumarka, dadka degan deegaanada xayiran ee miyiga ah, dadka laxaadka la' iyo saboolka. Waxaa sida oo kale khiyaar noqon kara barnaamijyada bulshadu ay ku samaysanayaan kaabayaasha.

Waxaa loo baahan yahay in la dejiyo istiraatiijiyad dadka oo dhami ku helayaan xiriir, taas oo taageerta barnaamijyada loo baahan yahay sidii qof kasta oo Soomaali ahi u heli lahaa adeegyada codka iyo internetka, oo ay kamid tahay wifi hotspots iyo meelo guud oo dadweynuhu ka helaan internetka, gaar ahaan dhulka miyiga ah.

### UJEEDDOOYINKA SIYAASADDA

- In adeegyada codka iyo internetka qaadweynta ay helaan dhammaan dadka Soomaaliyeed, taas oo ku salaysan hiigisiyada jaritaanka iyo gaarista adeegga.

- In adeegsiga adeegyada codka iyo qaadweyntu wax ku biiriyo isbeddelka dalka.

### 6.3.1 HIIGSIYADA AWOODDA IIBKA

Dowladdu si ay u qiimayso waxtarka istaatiijiyadaha kordhinta helitaanka iyo jabnaanta adeegga qaadweynta, waxaa muhiim ah in qeexitaanno iyo hiigsiyo cad laga yeesho jabnaanta adeegga. Tusaale ahaan, Xulafada Internet la Jari Karo waxay soo jeedinaysaa in 1GB oo internet ah kharashkiisu noqdo ugu badnaan 2% celceliska dakhliga billeha ah (ama hiigsiga "1 lagu helo 2"). Heerkan marka la joogo, waxaa la filayaa in kooxaha dakhligoodu hooseeyo ay awoodi karaan helitaanka adeeg internet oo bilow ah.

### 6.3.2 SIYAASADDA TARTANKA

Siyaasaddani waxay boorinaysaa horumarinta tartan adag si loo hubiyo in muwaadiniintu ay helaan khiyaarro ICT oo lagu helo kharash la jari karo. Waxaa taasi koobsanaysaa in caddaalad uu noqdo garoonka tartanku iyo in la helo tartan furan oo dhex mara jilayaasha suuqa oo ku qabsooma hab caddaalad ah, daahfuran oo aan lahayn faquuqitaan. Waxaa loo baahan yahay in la hindiso xeer-nidaamiyayaal si loo aqoonsado shirkadaha leh Awoodda Suuq ee Laxaadka leh, iyo in laga digo dhaqannada tartanka kasoo horjeeda sida wadashaqaynta qarsoon ee sharci-darrada ah, iyada oo ay jiraan tallaabooyin ku habboon oo laga qaadayo cidda jebisa xeer-nidaamiyayaashaas.

### 6.3.3 ISTIRAATIIJIYADAHA

- Dejinta iyo si joogto ah in loo qiimeeyo hiigsiyada adeegsiga codka iyo qaadweynta, si loo ogaado horumarka la sameeyay.
- Hubinta in xiriirka maylka ugu danbeeya laga heli karo meel kasta oo dalka kamid ah.
- Dhiirigelinta wadaagista kaabayaasha si loo dhimo kharashka, taas oo iyana kharashka ka dhimaysa adeegsadaha ugu danbeeya.
- In shirkadaha isgaarsiinta lagu dhiirigeliyo dhakhso inay u bilaabaan adeegyada.
- Hubinta in xeerarka tartanku ay dhiirigelinayaan jabnaanta adeegga iyo in suuqa ay soo geli karaan shirkado cusub, oo ay kamid yihiin shirkadaha yaryar ee heer-tuulo.
- Dejinta istiraatiijiyad dadka oo dhami ku helayaan adeegga xiriirka, taas oo buuxisa galdaloollada ka jira cardiga adeegyada codka iyo qaadweynta, oo leh shuruudo cadcad oo khuseeya bixinta taageerada.
- Dhismayaasha xiriirka leh ee adeegga bulshada (dugsiyada, goobaha caafimaadka, xarumaha booliska, maktabadaha, goobaha xiriirka guud, maamulka deegaanka, iwm) ee miyiga in looga faa'idaysto xiriir siinta dadweynaha deegaanka.
- Taageerista barnaamijyada lagu abuurayo dalabka adeegyada xiriirka, iyo taageerista barnaamijyada dhiirigelinaya wacyiga dadweynaha, xirfadaha digital-ka, iyo koronto gelinta meelaha looga baahan yahay si loo taageero baahiyaha xiriirka.

## 6.4 AMMAANKA XOGTA IYO AMNIGA INTERNETKA

Iyada oo la eegayo muhiimadda ay leeyihiin ICT-ga iyo kaabayaasha la xiriiraa, iyaga oo ah hab lagu gaarayo yoolasha horumarinta qaranka, waxaa lama huraan ah in la sugo ammaanka kaabayaasha, oo ay ku jiraan sir ahaanshaha, hufnaanta, iyo helitaanka dhammaan nidaamyada data-da ee la adeegsanayo. MPTT waxa ay kaashanaysaa aqoonta xeeldheerayaasha teknoolajiyadda, ammaanka, dhowrsanaanta, sharciga iyo ganacsiga si ay u qeexdo tallaabooyinka ammaan ee munaasibka ah, iyada oo isla markaasna ilaalinaysa furnaanshiyaha internetka, fursadaha hal-abuurka, iyo mabaad'ida aasaasiga ah ee xorriyadda hadalka, dhowrsanaanta, iyo helitaanka xogta.

Haddaba, halisaha ammaanka internetku si xowli ah ayay u dhalan-roganayaan sidaas darteedna siyaasadda wax ku oolka ahi waa inay noqoto mid debecsan si ay wax uga tarto halisaha haddeer jira, kuwa soo baxaya iyo kuwa dhalan-roganayaba. Intaas waxaa dheer, waa in mafaahiimta ammaanka xogta lagu daraa qaadashada iyo istiraatiijiyadaha horumarinta ICT-ga ee heerarka kala duwan oo dhan, si loo hubiyo in halisaha ammaanka wax lagaga qabto dhammaan nidaamyada dowladda. Taasi waxay keensanaysaa in dhammaan mas'uuliyiinta xogta ee dowladdu ay wada hindisaan habraac ay wadaagaan.

### 6.4.1 UJEEDDOOYINKA SIYAASADDA

- Aasaasidda istiraatiijiyadda ammaanka qaranka iyo guddida qaranka ee ka talo bixinta ammaanka internetka.
- Hubinta in kaabayaasha jireed ee ICT-ga ee lama huraanka ah laga ilaaliyo xatooyada iyo burburinta, iyo dejinta hannaanada soo celinta iyo shaqo sii socodka marka dhibi timaaddo.
- Ka qaybgalka iskaashiyada heer gobol iyo caalami si loo ilaaliyo dululaatiga internetka  (Cyperspace) Soomaaliya.
- Sugidda xuquuqda iyo dhowrsanaanta internerka ee muwaadiniinta, iyada oo la samaynayo shuruuc hubisa dhowrsanaanta xogta ay hayaan dowladda iyo waaxda gaarka ahi, taas oo la jaanqaadaysa yoolasha Xogta Furan, oo ay kamid tahay dejinta xeer-nidaamiyayaasha guud ee dhowrista xogta.
- Hubinta inay jiraan nidaamyada dhowrista carruurta ee internetka.
- Dhowrista xuquuqda mulkiyadda fikirka ee ganacsiyada ee internetka.
- Hubinta in habraacyada diiwaangelinta kaararka SIM iyo nidaamyada kale ee xaqiijintu in ay waafaqsan yihiin qorshayaasha nidaamyada aqoonsiga muwaadinka iyo halbeegyada caalamiga ah.

### 6.4.2 ISTIRAATIIJIYADO

Heerka khayraadka hay'adeed iyo farsamo ee loo qoondaynayo baahiyaha ammaanka internetka ee dalku waa in uu u dhigmaa khataraha la aqoonsaday. Tallaabada koowaad waa in la sameeyo qiimayn ku salaysan halista si loo aqoonsado, loona diiwaangleiyo kaabayaasha ICT-ga qaranka ee lamahuraanka ah, nidaamyada iyo hantida data ee u baahan dhowritaanka.

Si loo diyaariyo qaab-dhismeedka hay'adeed ee ku habboon wax ka qabashada baahiyaha dalka ee ammaanka internetka, dowladdu waxa ay si togan u qiimaynaysaa halisaha ku aaddan kaabayaasha iyo hay'adaha dowladda, iyo sida oo kale halisaha ku aaddan waaxda gaarka ah, bulshada rayidka ah iyo ururrada kale.

Waxaa la baarayaa qaabab kala duwan oo waaxda gaarka ah loogu boorriyo inay sii wanaajiyaan habdhaqankooda ammaanka internetka, oo ay kamid tahay in laga taageero horumarinta shaqaalaha. Waxaa la dejinaya qaab-dhismeed hay'adeed oo lagu dhowro hufnaanta, adkaysiga iyo ammaanka dhammaan kaabayaasha ICT-ga ee Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo Dowlad Goboleedyada iyo unugyada kale ee dowladda ee guud ahaan dalka, oo loo marayo qaab isku-xiran oo dhammaystiran. Tani waxa ay u baahan tahay wada-shaqaynta hay'adaha kala duwan ee dowladda.

Dhanka muwaadiniinta, dowladdu waxa ay hubinaysaa in dedaal laga sameeyo sidii loo kobcin lahaa wacyiga dadweynaha, loona wanaajin lahaa ammaanka internetka ee dadka oo dhan. Tani waxa ay koobsanaysaa in xeerar loo sameeyo ka dhowrista xogta iyo qalabka adeegsada galaangalka aan ogolaanshaha haysan, xatooyada, iyo si xun u adeegsiga.

## ISTIRAATIIJIYADO DHEERAAD AH

- Hubinta in rabitaanka dowladda ee ammaanka internetku aanu mijo-xaabin furnaanshiyaha aasaasiga ah ee internetka.
- Dhiirigelinta horumarinta iyo hirgelinta yoolasha dowladda ee ku saabsan ammaanka internetka iyada oo la kaashanayo waaxda gaarka ah iyo bulshada rayidka ah.
- Aasaasidda golaha ka talo-bixinta ammaanka internetka, iyada oo xeeldheerayaal laga helayo dowladda, waaxda gaarka ah, hay'adaha waxbarashada,garsoorka, adeegyada ammaanka iyo ururrada bulshada si dowladda loogala taliyo hirgelinta yoolasha siyaasaddan iyada oo isla markaasna dowladda lagu wacyigelinayo arrimaha ku cusub ammaanka internetka.
- Martigelinta wadatashi bulsho oo joogto ah oo ku salaysan ammaanka internetka ee Soomaaliya.
- Hindisidda qaab-dhismeed sharci oo munaasib ah oo ku saabsan dhowrista xogta iyo qalabka muwaadinka, taas oo labadii sanaba mar qiimayn iyo cusboonaysiin lagu sameeyo.
- Hubinta inaan ujeeddooyinkan siyaasadeed ee ammaanka internetku mijo-xaabin xuquuqda aasaasiga ah ee muwaadinka, gaar ahaan kuwa ay u badan tahay inay la kulmaan xagxagashada iyo xumaynta, sida dumarka, carruurta iyo kooxaha la faquuqo.
- La shaqaynta kooxaha amniga internetka/CERTs ee heer gobol iyo caalami.
- Hubinta in dhammaan kaabayaasha lama huraanka ahi ka dhowrsan yihiin burburin iyo xatooyo, iyada oo la dejinayo ciqaabaha sharci ee ku habboon.
- Fudaydinta tabobarro/aqoon wadaagis joogto ah oo ku saabsan arrimaha amniga internetka oo ay helaan garsoorka iyo laamaha ammaanku, si ay diyaar ugu noqdaan inay la tacaamulaan jebinta xeerarka/arrimaha soo if-baxa.

## 6.5 TAAGEERISTA U-SINNAANTA HELITAANKA

ICT-gu waxa ay fursado badan siiyaan kooxo badan oo bulsho iyo dhaqan ahaan laga fursado badan yahay, kuwaas oo haddii kale ka faquuqnaan lahaa bulshada inteeda kale, gaar ahaan dadka qowmiyad ahaan laga tiro badan yahay, dumarka, hablaha, dhalinyarada iyo dadka laxaadka la'. Si loo hubiyo dadkaasi inay faa'idada ugu badan ka helaan teknoolajiyaddan, waxaa loo baahanayaa in tallaabooyin cayiman laga qaado dhinacyo kala duwan, sida ku faahfaahsan hoos.

### 6.5.1 UJEEDDOOYINKA SIYAASADDA

- Adeegsiga ICT-ga in looga faa'idaysto sii wanaajinta nolosha kooxaha laga fursadaha badan yahay.
- In sinnaan laga gaaro galaangalka/helitaanka dhammaan dhinacyada siyaasadaha iyo qorshayaasha, laga bilaabo dhiska xirfadaha ilaa qaadashada iyo adeegsiga tiknoolajiyadda.
- Gorfayn in lagu sameeyo qorshayaasha ICT-ga si loogu daro xeerinta jinsiga iyo kooxaha kale ee laga fursadaha badan yahay.

### 6.5.2 ISTIRAATIIJIYADO

- Samaynta hantidhowrka sinnaan la'aanta galaangalka tiknoolajiyadda, si looga dhigto qiimayn bar-bilow ah oo muujisa heerka galaangalka iyo adeegsiga internetka ee kooxaha laga fursadaha badan yahay, gaar ahaan dumarka iyo hablaha Soomaaliya.
- Maalgalinta cilmi baaris lagu ogaado galaangalka iyo adeegsiga muwaadiniinta Soomaaliya ee internetka. Xogta (data) aan isku rarnayn ayaa lagu ururinayaa, taas oo loo adeegsado gorfaynta qaabka galaangalka iyo adeegsiga internetka ay ugu kala duwanyihiin jinsiga, heerarka dakhliga, waxbarashada, dad'da iyo canaasirta kale ee bulsho.
- Sii wanaajinta helitaanka xogta ku saabsan galaangalka/helitaanka iyo adeegsiga ICT-ga taas oo loo kala qaad-qaaday jinsiga, da'da iyo shuruudaha kale ee la xiriira.
- Kharash in loo qoondeeyo dhiirigelinta iyo taageerista hal-abuurrada ganacsiga ee laga faa'idada badan yahay, tabobarka aqoonta digital-ka, iyo galaangalka dadweynaha ee bartilmamasan iyo barnaamijyada kale ee taageeraya galaangalka iyo adeegsiga ICT-ga.
- Hubinta in barnaamijyada xirfad-dhiska iyo tabobarrada la hindiso iyada oo la tixgelinayo baahiyaha kooxaha laga faa'idooyinka badan yahay ee heerarka kala duwan ee waxbarasho leh.
- Aasaasidda barnaamij deeqo waxbarasho oo sare loogu qaadayo helitaanka kooxaha laga fursadaha badan yahay ee tabobarka.
- Hubinta in ay jiraan habab ammaan oo taageeraya adeegsiga dhalinyarada ee ICT-ga.
- Hubinta in adeegyada dowladda ee elektroonigga ahi u furan yahay dadka oo dhan – degallada internetku waxa ay raacyaan halbeegyada galaangalka, waxaana lagu helayaa af Soomaali.
- Tabobarka howlwadeennada ICT-ga ee dowladda si adeegyada ICT-ga dowladda looga dhigo kuwo u fudud galaangalka kooxaha laga faa'idada badan yahay.
- In ICT-ga iyo adeegyada kalkaalinta leh loo isticmaalo istiraatiijiyadaha galaangalka dadka oo dhan, kuwaas oo ay jari karaan dadka laxaadka la'.
- Xiriirka dowladdu in uu ku baxo qaab ay heli karaan dadka laga faa'idada badan yahay.

## 6.6 HORUMARINTA KHAYRAADKA DADKA

Dhisidda bulsho iyo shaqaale garanaya adeegsiga ICT-ga oo awood u leh inay si buuxda uga faa'idaystaan farsamadaasi waa arrin mudnaan ay siiyaan dalalka oo dhami, oo ay ku jirto Soomaaliya. Dedaal awooda la isugu geeyay ayaa dhinacyo badan lagu bixinayaa si loo hubiyo in arrintaas la helo. Si lamid ah dalal badan oo caalamka ah, Soomaaliya waxa ay ka cabanaysaa yaraanta tirada dadka leh xirfadda iyo khibradda ICT-ga iyo xirfadaha la xiriira ee sida weyn u adeegsada ICT-ga. Si arrinkan wax looga qabto, Soomaaliya waa in ay dhistaa xirfadda iyo awoodda ICT-ga ee bulshadeeda, iyada oo ka faa'idaysanaya karaanka ICT-ga ee tabobarka iyo wax-dhigashada dhakhsaha ah, iyada oo isla markaasna barnaamijyada tabobarka iyo waxbarashada la waafajinayo barnaamijyada waxbarasho ee daboolaya baahiyaha suuqa shaqada, iyada oo sida oo kalena la hubinayo in khibrad kasta oo dibadda laga keeno loo daadajiyo muwaadiniinta. Arrinkan waxaa taageeraya Mac'hadka Tabobarka Is-gaarsiinta Qaranka (NTI) ee ay maamusho MPTT, kaas oo bixiya koorsooyin gaa-gaaban.

Waxaa muhiim ah in la ogaado waxbarashada masaafada dheer ee ay fudaydinayso adeegga qaadweyntu in laga helayo fursado kobcinaya waxbarashada dadka oo dhan, oo ay ku jirto faragelinnada bartilmaamsan ee awoodda saaraya kooxaha laga fursadaha badan yahay, iyo sida oo kalena habraacyada wax-dhigista ee cusub, shaybaaradda jilitaanka, dhismayaasha dadweynaha u furan, maktabadaha, wax-dhigashada nolosha oo dhan iyo tabobarka xirfadaha digitalka.

Sidaas si lamid ah, waxaa loo baahan yahay hay'adaha tacliinta iyo cilmi-baarista in la taageero si ay u awoodaan inay samaystaan shabakado-xarumeed iyo xiriir ballac-liid (bandwith) heersare ah. Tani waxa ay hay'adahaas ka caawinaysaa yaraynta mushkiladda maqnaanshaha agabka waxbarista. Shirkadaha isgaarsiinta caalamiga ah waa in lagu boorriyaa inay Soomaaliya qiimo-dhimis ku siiyaan xiriir heer caalami ah oo loo adeegsado baahiyaha waxbarasho.

### 6.6.1 UJEEDDOOYINKA SIYAASADDA

- Kordhinta tirada iyo tayada dadka leh xirfadaha ICT-ga ee Soomaaliya.
- Dadka Soomaaliyeed inay ICT-ga u adeegsadaan maalin nololeedkooda caadiga ah.
- Go'aan qaatayaasha siyaasadeed, hoggaamiyayaasha bulshada iyo bulshada rayidka ah, iyo sida oo kale maamulayaasha waaxda guud in ay fahan wanaagsan ka haystaan ICT-ga.
- Ardaydu inay dugsiyada, hay'adaha tacliinta sare/tabobarka ka helaan nidaamyada waxbarashada internetka.
- Waaxda ICT-gu inay xarumaha cilmi-baarista/hal-abuurka ka taageerto barnaamijyada tabobarka hay'adeed.
- Dhammaan hay'adaha tacliinta heerka saddexaad inay isku-xiran yihiin oo ay bixiyaan koorsooyin ICT oo ah heerka Degree.

### 6.6.2 ISTIRAATIIJIYADO

- Maaddooyinka ICT-ga in lagu daro dhammaan heerarka waxbarashada iyo in nidaamka waxbarashadu helo galaankalka barnaamijyada ICT-ga.
- Yagleelidda shabakado waxbarasho oo lagu wadaago agabyada waxbarashada iyo dhiirigelinta waxbarashada elektrooniga ah.
- Fudaydinta Iskaashiga Dowladda iyo Ganacsiga Gaarka ah si loo taageero barnaamijyada waxbarashada elektrooniga ah.
- Korinta danaynta cilmi baarista iyo howlgallada horumarinta ee la xiriira ICT-ga.
- Aasaasidda olole qaran oo ku aaddan farbarashada ICT-ga ee dadweynaha, iyo ballarinta iyo sii wanaajinta waxbarashada dadka waaweyn, barnaamijyada waxbarashada nolosha oo dhan iyo farbarashada digitalka ah, gaar ahaan kuwa ku aaddan dib u tabobarista iyo cusboonaysiinta shaqaalaha hore u sii jiray.
- Dhiirigelinta yagleelidda Xarumaha (excellence) ICT-ga oo sida oo kale taageera cilmi baarista iyo horumarinta.
- Taageerista tabobarka ICT-ga ee go'aan qaatayaasha, hoggaamiyayaasha bulsheed iyo mujtacma rayidka ah.
- Bixinta fursado cusub oo ICT-ga ay ku helaan dumarka, dhalinyarada, dadka laxaadka la' iyo kuwa laga fursadaha wanaagsan yahay, gaar ahaan dadka la faquuqo iyo kuwa aan waxna qorin waxna akhriyin, si wax looga qabto sinnaan la'aanta bulsheed, iyada oo la adeegsanayo arrimaha ay kamid yihiin xarumaha dadka u furan iyo maktabadaha elektrooniga ah.
- Fursado u abuuridda iyo kaalmo siinta dadka laga fursadaha badan yahay iyo kuwa leh baahiyaha gaarka ah, dumarka iyo dhalinyarada si ay u bartaan xirfadaha IT-ga.
- Bilaabista tallaabooyin lagu dhiirigelinayo, sarena loogu qaadayo tabobarka baahiyayaasha iyo warbaahinta.
- Hubinta yagleelista koorsooyinka ICT-ga ee heerka shahaadada koowaad iyo jagooyinka cilmi-baaris ee heerarka tacliinta sare iyo PhD-kadib oo ku salaysan ICT.
- Sare u qaadista galaangalka internetka ee hay'adaha waxbarashada ee heerarka oo dhan.

## 6.7 HAL-ABUURKA, CILMI-BAARISTAIYO HORUMARINTA

Taageeridda horumarinta khayraadka dadka ee ICT-ga waxaa xiriir dhow la leh fududaynta hal-abuurka, iyo R&D. Arrintani waxa ay leedahay awood-saaristeeda siyaasadeed, sababta oo ah karaankeeda shaqo iyo hanti abuur ee ka dhalanaya hal-abuurka ICT-ga, iyo sida oo kale abuursita fursdaha lagu sii wanaajinayo tayada nolosha. Yagleelista "aagaga tiknoolajiyadda, hooy-ada tiknoolajiyada/hal-abuurka, aagagga ku-wada-shaqaynta iyo karaarshayayaasha oo si wanaagsan u qalabaysan, kuwaas oo laga helo ababinta ganacsiga, ganacsiyada yaryarna ka helaan xirfadaha iyo adeegyada ICT-ga oo jaban, waxa ay sida oo kale qayb ka yihiin taageerada hal-abuurka ganacsiga elektrooniga ah iyo kobaca dhaqaale ee Soomaaliya. Haatan waxaa Soomaaliya ka jira sadex hooy tiknoolajiyeed – Hargeysa, Muqdisho iyo Garoowe.

Intaas waxaa dheer, munaasibado joogto ah oo ay isugu yimaaddaan daneeyayaasha waaxda oo ku qabsooma habab kala duwan ayaa muhiim u ah fudaydinta isweydaarisga xogta, is-barashada, horumarinta ganacsiga iyo dhiska karaanka. Sanadkii 2018 waxaa la qabtay saddex munaasibadood oo noocan ah:

- Shirka Kooxda Maamulayaasha Shabkadaha (SomNOG), kaas oo ay isugu yimaaddeen injineerrada waaxdu si ay u falanqeeyaan, u wadaagaan khibradda, ugana wada shaqeeyaan horumarinta khibraddooda iyo kartidooda shabakadaha iyo Tiknoolajiyadaha Internetka.
- Carwo ICT oo ay ka qaybgaleen ganacsiyada ICT, shirkadaha dalka ee diiwaangeliya magacyada degellada, hay'adaha tacliinta iyo daneeyayaasha kale, taas oo loogu talogalay isbarasho iyo ganacsi. Waxaa la filayaa in shirkadaha ICT-ga ee caalamku inay mustaqbalka kasoo qaybgali doonaan carwadan.
- Shirka Tiknoolajiyadda ee Muqdisho: oo isu keenay hal-abuurrada iyo hooy-yada tiknoolajiyadda ee dalka.

Wasaaraddu waxa ay sida oo kale qorshaynaysaa inay bilawdo Abaalmarinnada ICT-ga oo lagu maamuuso guulaha ICT-ga ee dowladda, waaxda gaarka ah, dumarka, dhalinyarada, iwm.

### 6.7.1 UJEEDDOOYINKA SIYAASADDA

- Dedejinta qaadashada Soomaaliya ee adeegsiyada (applications) iyo nidaamyada ICT-ga soo if-baxaya ee cusub, oo ay kamid tahay adeegsiga IoT iyo Big Data.
- Kordhinta tirada wax soo saarka milkiyadda fikirka ee ka dhalanaysa cilmibaarista iyo horumarinta ICT-ga.
- In uu muuqdo korodhka tirada shaqooyinka waaxda ICT-ga.

### 6.7.2 ISTIRAATIIJIYADO

- Qiimayn in lagu sameeyo howlaha hal-abuurka, cilmibaarista iyo horumarinta ee Soomaaliya.
- Hindisidda istiraatiijiyad hal-abuur oo leh hiigsiyo la cabbiri karo iyada oo la marayo habraac daneeyayaal badan.
- Kordhinta guud ahaan maalgashiga cilmibaarista iyo horumarinta ICT-ga.
- Aqoonsiga fursadaha maalgelin ee kordhinta tirada iyo baahsanaanta hooy-yada tiknoolajiyadda/hal-abuurka, aagagga ku-wada-shaqaynta iyo aagaagga tiknoolajiyadda ee Soomaaliya.
- Fududaynta shuraakoobidda dowladda iyo waaxyaha gaarka ah ee ku saaabsan hal-abuurka iyo in R&D lagu xiro fursadaha maalgashiga gaarka ah iyo bixinta dhiirigelinta waaxda ICT-ga.
- Taageerista munaasibadaha joogtada ah ee isu keena dadka daneeya tiknoolajiyadda, cilmi baarayaasha, ganacsiyada iyo hal-abuurrada ganacsiga, sida Shirka Muqdisho ee Tiknoolajiyaddda.
- Dib u eegista siyaasadaha canshuurista qalabka iyo barnaamijyada ICT-ga ee ay u baahan yihiin shirkadaha bilowga ah.

## 6.8 GANACSIGA ELEKTROONIGA AH, ILAALINTA XOGTA IYO DHOWRSANAANTA

Soo if baxa dhaqaalaha digital ka ah iyo ganacsiga elektrooniga ahi waxaa laga helayaa fursado badan oo lagu kordhiyo wax ku oolnimada howlgalka ganacsiga iyo galaangalka suuqyada cusub. Sida oo kale, ganacsiga elektrooniga ahi waxa uu keenay xiriir masaafo dheer oo xoog leh oo dhexmara iibsadaha iyo sii iibiyaha (gadaha). Deegaankan cusub, way sii waynaanaysaa baahida dhowrista macmiilka iyo xeer-nidaaminta dhowrsanaanta data-da, si loo dhowro xuquuqda macmiilka. Soomaaliya ilaa haatan ma laha xeerarkan, taasina waxay u baahan tahay in wax laga qabto si waafaqsan Tusmooyina Qaramada Midoobay ee Dhowrista Macmiilka oo xoogga saara muhiimadda ay leedahay kordhinta kalsoonida macmiilka ku qabo ganacsiga elektroonigga ah, iyada oo la adeegsanayo siyaasadaha dhowrista macmiilka iyo dhowrsanaanta oo daahfuran oo waxtar leh, taas oo hubinaysa in uu gaarsiisan yahay isla heerka dhowrsanaan ee ganacsiyada kale.

### 6.8.1 UJEEDDOOYINKA SIYAASADDA

- In mucaamalaadka internetku leeyihiin isla meeqaamka wax isweydaarsiga soo-jireenka ah ee jireed.
- Xeer-nidaamiyayaasha iyo habraacyadu inay taageeraan mucaamalaadka elektrooniga ah, ay aqoonsadaan saxeexa digital ka ah, dadweynahana ay si waxtar leh uga ilaaliyaan dhaqannada suuqgeyneed ee aan cadaaladda ahayn ee khiyaamadu ku jirto, ka ilaaliyo adeegsiga aan la doonayn ee xogta macmiilka ee gaarka ah iyo ku xadgudubka dhowrsanaanta ee ka dhalanaysa adeegsiga xogta internetka.
- In dadku heli karaan habab khilaaf xallin oo dhakhso iyo cadaalad ah, kaas oo laga helayo xaal-marin degdeg ah iyada oo aan macmiilku mudanaynin culays aan loo baahnayn.
- In la qeexo sharcinimada mucaamalaadka internetka, dhowrista carruurta ee internetka iyo hubinta in maxkamaduhu ay aqbalayaan caddaymaha elektrooniga ah.
- Xeer-nidaamiyayaal ku saabsan xayaysiiska, bar iibka, qaan sheegadka, shaacinta, shuruudaha heshiiska, habraacyada cabashooyinka, ilaalinta dhowrsanaanta, macaamiisha laxaadka la’, iyo dhowrista xogta.
- In guryaha iyo ganacsiyada iyo hay’aduhu ay leeyihiin cinwaanno jireed oo goonni ah si loo fudaydiyo howlaha ganacsiga elektrooniga ah.

### 6.8.2 ISTIRAATIIJIYADO

- Aqoonsiga iyo dejinta dib u habaynta sharci ee looga baahan yahay taageerista ganacsiga elektrooniga ah.
- Hubinta in macaamiishu ay awood u leeyihiin inay qaataan go'aanno xog ku salaysan marka ay joogaan barta iibka.
- Cusboonaysiinta xeerarka guud ee ganacsiga iyo xeerarka ciqaabta.
- Diyaarinta iyo hirgelinta tallaabooyinka sharci ee ka dhanka ah adeegsiga aan la ogoleyn ama sharci darrada ah ee xogta shakhsiga ah iyo xumaynta/ku xadgudubka carruurta.
- Shardi ka dhigista in dhinacyada ururiya xogtu ay muwaadiniinta ogeysiiyaan adeegsiga xogta shakhsiga ah.
- Aqoonsiga qaabka munaasibka ah ee dhammaan goobaha magaalooyinka lagu siinayo cinwaan jireed.

## 6.9 ISBEDDELKA DIGITAL-KA EE DOWLADDA

Yoolka guud ee hirgelinta adeegyada dowladda ee elektrooniga ahi waa in dowladda laga dhigo mid wax ku ool ah islamarkaana doonista muwaadinku saldhig u tahay. Sidaas darteed, siyaasadda iyo istiraatiijiyadda dowladda elektrooniga ahi waxa ay awoodda saaraysaa kordhinta iyo sii wanaajinta helitaanka adeegyada dowladda oo ay taageerayso siyaasadda iyo istiraatiijiyadda maamulka xogta dowladda oo xisaabta ku darsanaysa baahida dhowrsanaanta, dhowrista data-da, isku xirka data-da iyo is waafajinteeda, adeegsiga xarunta data-da dowladda iyo wadaagista aqoonta:

Dowladdu waxa ay sida oo kale adeegsanaysaa istiraatiijiyadaha Data-da Furan, kuwaas oo muhiim u ah abuurista fursado hal-abuurka ganacsiga ee cusub, dhiirigelinaya cilmibaarista sayniska, kordhinaya ka qaybka bulshada ee dowladda, sare na u qaadaysa isla xisaabtanka.

### 6.9.1 UJEEDDOOYINKA SIYAASADDA

Ujeedooyinka guud ee isbedelka digital ka ee dowladdu waa in:

- La yagleelo nidaamka Aqoonsiga Muwaadinka.
- Kharashka mucaamalaadka  laga dhimo dowladda, muwaadiniinta iyo waaxda gaarka ah iyada oo adeegga lagu bixnayo hab elektroonig ah.
- Sare loo qaado tartan-galka Soomaaliya iyada oo xogta iyo adeegyada dowladda lagu bixinayo si dhakhso ah.
- Galaangalka diiwaannada guud, arkiifyada digital ka ah, iyo xogta kale ee ay hayaan hay'adaha guud lagu helo qaab ay fududahay in la helo oo la adeegsado (data-da furan)
- In laamaha Boostada Soomaaliyaa laga helo xarun galaangal looga yeelan karo dhammaan xogta iyo adeegyada Dowladda.
- Nidaamyada xogta dhulku inay haqabtiraan baahiyaha dowladda, waaxda gaarka ah iyo dadweynaha ee xogta ku saabsan milkiyadda dhulka, si looga faa'idaysto qorshaynta beeraha iyo maaraynta khayraada dabiiciga ah.
- Diiwaangelinta cod bixiyaha ee digitalka ah iyo nidaamyada doorashooyinka ay u sii wanaajiyaan daahfurnaanta iyo ku kalsoonaanta doorashada.
- La helo ardaa dowladeed oo internetka ah oo laga helo dhammaan xogta iyo adeegyada dowladda.

### 6.9.2 ISTIRAATIIJIYADAHA

- Aasaasidda Guddida Isku-duwidda Dowladda Elektroonigga ah, si ay u bilowdo barnaamijyada dowladda elektroonigga ah oo awoodda saaraya hirgelinta barnaamijyada.
- Adeegyada ICT-ga in la dhexgeliyo hadafyada horumarinta  ee dowladda iyo, arrimaha iyo barnaamijyada ay mudnaanta siinayso.
- Ballaarinta baaxadda internetka ay iminka  helaan hay'addaha dowladda iyo in hay'adaha kale ee aan iminka internet lahayn in la siiyo awood internet oo ku filan.
- Hirgelinta khayriyado data-furan oo lagu dowladdu ay dhexdeeda iyo dadweynahaba kula wadaagto data-da.
- Diiwaangelinta hannaanada howlgalka ee hay'adaha dowladda oo idil.
- Aqoonsiga iyo diiwaangelinta xogta ka dhaxaysa ee ay tahay inay wadaagaan hay'duhu.
- Hay'adaha dowladdu inay degalladooda internetka iyo boostada elektrooniga ah u adeegsadaan magaca degelka ee heerka labaad – gov.so.
- Qaadashada istiraatiijiyad lagu dhisayo nidaamka xogta dhulka ee Soomaaliya
- Qiimaynta baahiyaha iyo suurtogalnimada nidaam doorasho oo digital ah.

### 6.10 CAAFIMAAD ELEKTROONIG AH (E-HEALTH)

Maamulka adeegyada caafimaadku faa'idooyin waaweyn ayuu ka heli karaa adeegsiga ICT-ga, kaas oo wanaajinaya dhago-nugalyka adeegga iyo saxnaanta ogaanshaha cudurka iyo daaweynta dadweynaha. Faa'idooyinkaas waxaa kamid ah maamulka wax ku oolka ah ee bukaanka, dedejinta gudbinta natiijooyinka baaritaannada caafimaad, iyo helitaanka khibradda dhakhaatiirta takhasuska ah ee goobaha fog ku sugan. Si tan looga faa'idaysto, hawlwadeennada caafimaadku waa inay leeyihiin xirfadaha digitalka ah, hay'adaha caafimaadkuna waa inay yeeshaan xiriir internet oo wanaagsan, waa na inay si dhakhso ah u heli karaan xogta bukaanka iyo dhakhaatiirta takhasuska ah.

Arrimo badan ayay tahay in la tixgeliyo marka la hirgelinayo nidaamyada caafimaadka elektroonigga ah, oo ay kamid yihiin maamulka, korjoogga, daahfurnaanta, galaangalka, isla-xisaabtanka, dhowrsanaanta iyo ammaanka. Isku-xirnaanta iyo isku-tiirsanaanta nidaamyada xogtu waxa ay ka dhigan tahay inay muhiim tahay in la dhowro halbeegyada adeegsiga iyo shaacinta.

### 6.10.1 UJEEDDOOYINKA SIYAASADDA

- In la qaato istiraatijiyad caafimaad elektroonig ah oo ICT-ga uga faa'idaysanaya wax ka qabashada baahiyaha xog iyo xiriir ee nidaamka caafimaadka.
- In uu jiro Nidaamka Xogta Caafimaadka oo ay kamid tahay diiwaanka xogta bukaanku.
- In la adeegsado dhaqanno maamul iyo goob caafimaad oo waxtar badan.

### 6.10.2 ISTIRAATIIJIYADO

- Taageeridda kharashka ay hay'adaha caafimaadku ku helayaan xiriirka qaadweynta.
- Naqshadaynta istiraatiijiyadda qaranka ee caafimaadka elektrooniga ah iyo nidaamka xogta oo wax ka tarta baahiyaha adeegyada iyo barnaamijyada caafimaad.
- Aqoonsiga iyo hirgelinta barnaamijyada mudnaanta leh ee ay tahay in la dhex geliyo Nidaamka Maamulka Xogta Caafimaadka.
- Hirgelinta mabaadi'da dhowrsanaanta ee adeegsiga iyo isweydaarsiga xogta shakhsiga ah.
- Dhisidda barnaamijyo caafimaad oo adkaysi leh oo ku salaysan nidaamyo xog oo isku shaqaynaya.
- Dhisidda karaanka howlwadeennada daryeelka caafimaad, iyo inay galaan barnaamijyo joogto ah oo u ogolaanaya inay la socdaan dhaqannada ku cusub ICT-ga.

## 6.11 WAXBARASHADA ELEKTROONIGGA AH

Kororka adeegsiga ICT-gu waxa uu waaxda waxbarashada ka taageerayaa maamulka iyo wax-dhigista labadaba. In kasta oo aqoonta kombiyuutarka iyo xirfadaha lagu maaxayo internetku ay lagama maarmaan u yihiin dugsiyada iyo hay'adaha tacliinta sare, waxbarashada elektroonigga ahi waxay sida oo kale u baahan tahay xirfadaha galaangalka, gorfaynta, midaynta iyo in xogta lagu soo gudbiyo qaab cad oo maangal ah.

Ka guurista habka wax dhigista ee ku salaysan baraha (macallinka), ee loo guurayo taageerisa adeegsiga barnaamijyada iyo khayriyadaha ICT-ga si loo helo agabka waxbarasho, waxa ay u baahanaysaa maalgashi mug leh in la geliyo dhisitaanka xirfado cusub, isku xirka barayaasha iyo ardayda iyo fudaydinta helitaanka xogta tayada leh si loo ballaariyo fursadaha wax-barasho. Intaas waxaa dheer baahiyaha internet awood badan sababta oo ah baahida in la helo agab waxbarasho oo muuqaal ah.

### 6.11.1 UJEEDDOOYINKA SIYAASADDA

- In ay jirto siyaasad qaran oo ku saabsan waxbarashada elektroonigga ah, taas oo taageerta in ICT-ga loo adeegsado wax ka tarista baahiyaha iyo barnaamijyada waxbarashada.
- In dhammaan ardayda dugsiyada sare iyo hay'adaha tacliinta sare ay helaan internet.
- Dugsiyada hoose inay bixiyaan ugu yaraan hal maaddo oo ku saabsan aqoonta kombiyuutarka.
- Dugsiyada sare in ay bixiyaan ugu yaraan hal koorso ama barnaamij oo ku saabsan ICT-ga.
- Hay'adaha tacliinta sare in ay bixiyaan shahaadooyin ICT.
- Macallimiint dugsiyada sare in lagu tabobaro ICT-ga inay u adeegsadaan wax-dhigista.
- Diyaarinta manhajka in laga taageero u adeegsiga ICT-ga waxbarashada.

### 6.11.2 ISTIRAATIIJIYADO

- Qiimayn in lagu sameeyo galaangalka internetka ee dugsiyada sare iyo hay'adaha tacliinta sare.
- Maalgashiga soo-saarista agabka waxbarasho ee masaafada fog laga adeegsan karo.
- Ardayda in laga taageero helitaanka kombiyuutarrada gacanta iyo xiriirka iyada oo la adeegsanayo barnaamij kab ama deyn ah.
- Aasaasidda xarunta tabobarka ICT-ga oo taageero siisa barayaasha.

## 6.12 BEERAHA ELEKTROONIGGA AH

ICT-gu waxa uu kacaan ku samayn karaa qaabka loo maamulo waaxda beeraha, waxaana uu sare u qaadi karaa ammaanka cuntada ee dalka. Waxaa loo baahan yahay in la taageero qulqulka xogta ee dhexmaraysa beeralayda, macaamiisha iyo culimada beeraha, taas oo keenaysa wax soo saarku in uu bato, uuna noqdo mid ka falcelinaya baahiyaha macmiilka. ICt-ga waxa uu sida oo kale suurtogelinaya in beeralayda yari galaangal weyn u yeeshaan suuqa. ICT-ga waxaa sida oo kale loo adeegsan karaa in la sii wanaajiyo qorshaynta  iyo sida oo kale la socodka iyo saadaalinta wax soosaarka dhulka iyo goobaynta xoolaha nool ee dalka oo dhan. Tani waxa ay u baahan tahay in la sameeyo bakhaar-xog/database lagu diiwaangeliyo heerarka xoolaha nool, lagagana hortago xatooyada, sida oo kalena lagu xakameeyo faafidda cudurrada.

### 6.12.1 UJEEDDOOYINKA SIYAASADDA

1. In waaxda beeruhu awood u leedahay inay si buuxda uga faa'idaysato fursadaha adeegsiga ICT-ga ee kordhinta wax soo saarka beeraha iyo wax ku oolnimada laga helo.
2. Beeralaydu in ay galaangal u leeyihiin xogta suuqa si ay uga adeegsadaan iibsiga agabka beeraha iyo iibka xoolaha nool iyo dalaggooda.
3. Cilmi-baarista beeruhu inay sii fiicnaato sababta oo ah galaangalka fiican ee xogta.
4. Beeralaydu inay helaan xogta iyo nidaamyada digniinta hore si ay u wanaajiyaan ammaankooda cunto iyo dakhli samayntooda.

### 6.12.2 ISTIRAATIIJIYADO

1. Digital in laga dhigo aqoonta beeraha iyo diiwaannada la xiriira maamulka beeraha.
2. Taagerista in barnaamijyada lacag-bixinta ee elektrooniga ah loo adeegsado iibisashada wax soo-saarka beeraha iyo kalluumaysiga.
3. Taageerista hindisidda goob internet oo lagu wada iibiyo, suuqgeeyo wax soo saarka xoolaha iyo beeraha.
4. In beeralayda la siiyo xogta istiraatiijiga ah ee ku saabsan tiknoolajiyadda iyo farsamooyinka beeraha, saadaasha hawada, iyo xogta suuqa.
5. Horumarinta nidaamka xogta juquraafiga si loo kaydiyo adeegsiga dhulka

   ee beeraha iyo maaraynta khayraadka dabiiciga ah.

## 6.13 HORUMARINTA MUXTAWAHA (CONTENT) WADDANIGA AH

Helitaanka muxtawe waddani ah waa laga maarmaan si loo buuxiyo baahiyaha dadweynaha Soomaaliya, waxaana uu taageerayaa abuurista dalabka adeegyada. Marka laga yimaaddo horumarinta adeegyada dowladda elektroonigga ah, dowladdu waa inay dhiirigelisaa soo-saarista muxtawaha waxbarasho, dhaqan iyo saynis, iyo horumarka waaxda dhaqanka ee waddanka oo ku habboon siyaaqa af iyo dhaqan ee adeegsadyaasha.

### 6.13.1 UJEEDOOYINKA SIYAASADDA

Abuurista muxtawe (content) weyn oo waddani ah oo dan u ah dadweynaha Soomaaliya.

Hubinta in dadku helaan arshiifyo digital ah iyo in muxtawaha internetku ay ka turjumayaan dhaqanka dalka iyo in lagu kaydiyo hiddaha dhaqan.

Kororka soo-saarka dalka ee muxtawaha codka iyo muuqaalka ee madadaalada iyo waxbarashada.

### 6.13.2 ISTIRAATIIJIYADO

1. Hubinta inay jiraan sharci ilaalinaya xuquuda milkiyadda fikirka.

Abuurista arrimo dhiirigelinaya diyaarinta muxtawaha iyo barnaamijyada waddaniga ah.

Taageerista barnaamijyada tabobarka  ee wax soosaarka muxtawaha iyo barnaamijyada.

### 6.14 MAALGASHIGA IYO MAALGELINTA

Hubinta in siyaasadaha iyo istiraatiijiyadaha lagu faahfaahiyay Siyaasaddu ay helaan maalgelin ku filan waxay shardi u tahay hirgalkooda. Dowladdu waxa ay leedahay doorka lama huraanka ah ee ah inay abuurto deegaan awoodsiinaya oo soo jiidanaya maalgashiga iyo maalgalinta daneeyayaasha badan, iyo kobcinta deegaan suurtogelinaya barnaamijyo PPP oo raandhiis ah. In kasta oo waaxda ICT-gu ay sanadihii ugu danbeeyay heshay maalgelin laxaad leh, waxaa haddana la sii wanaajin karaa siyaasadda iyo qaab-dhismeedka jira iminka si wax looga qabto hubaanti la'aanta niyad jabin karta maalgashiga, iyo in la abuuro qaab-dhismeed PPP kaas oo dhiirigelinaya bahwadaagnimada dowladda iyo waaxda gaarka ah.

#### 6.14.1 UJEEDDOOYINKA SIYAASADDA

1. Kororka maalgashiga waddaniga ah iyo ka shisheeyaha tooska ah ee waaxda ICT-ga.
2. Kordhinta tirada shuraakooyinka dowladda iyo ganacsiga gaarka ah ee dhanka ICT-ga.
3. In maalgelin ku filan loo helo mashaariicda ICT-ga ee dowladda iyada oo la adeegsanayo qoondayn miisaaniyadeed oo munaasib ah iyo shuraakooyin lala galo maalgelinta bahwadaagta horumarka iyo waaxda gaarka ah.
4. In la sameeyo ilo maalgelin oo dheeraad ah sida maalgelin wadareedka qurbo-joogta.

#### 6.14.2 SOO-KOOBISTA ISTIRAATIIJIYADAHA

1. Abuurista deegaan awoodsiinaya, oo ay ku jirto sharciga PPP, kaas oo soo jiita maalgashiga waddaniga ah iyo ka shisheeyaha ah.
2. Sare u qaadista wacyiga fursadaha ka baannaan maalgashiga waaxda ICT-ga ee Soomaaliya.
3. Bah-wadaagta horumarka in lagu dhiirigeliyo barnaamijyadooda inay waafajiyaan Siyaasaddan iyo qorshahan istiraatiijiga ah.

## 7. FULINTA SIYAASADDA & ABAABULKA KHAYRAADKA

Siyaasaddu inay xaqiijiso hadafyadeeda waxaa lama huraan u ah siyaad hirgelin iyo abaabul khayraad oo waxtar iyo wax ku ool ah. Taasi waxa ay u baahan tahay in hirgelinta lagu taageero qoondayn khayraad oo ku filan iyo la socosho iyo qiimayn waxtar leh, oo ay u dhammaystiran tahay tusayaasha waxqabadku. Dhankan, Siyaasaddu waa inay noqotaa aasaaska lagu dhisayo qorshayaasha howlgalka waaxda ICT-ga iyo hagaha horumarinta siyaasadaha waaxda iyo habraacyada cayiman ee hirgelinta.

Ka dib wadatashi bulsho iyo ansixinta Siyaasadda kama dambaynta ah, wejiga koowaad ee abaabulka khayraadku waa in uu ka koobnaada hannaan khariidadaynta si loo aqoonsado heerka ay taagan yihiin hiigsiyada laga shaqaynayo iyo ilaha khayraadka loo baahan yahay si hannaankaas loo dhamaystiro. Intaas waxaa dheer, in qiimayn lagu samayn doono heerka hirgelinta iyo meel marinta xeerarka waaxda khuseeya ee hadda jira. Intaas kadib, waxaa la qiimaynayaa kharashka uu ku kacayo gaarista hiigsiyada ay dejisay siyaasaddu, qiimayntaas oo ay samaynayso hay'adda dowladeed ee hiigsi kastaa khuseeyo, iyadoo ay garab socoto aqoonsiga ilaha laga heli karo maalgelinta iyo hababka lagu dalka dhexdiisa looga ururin karo maalgelinta.

### SOO KOOBISTA KHIYAARAADKA URURINTA KHAYRAADKA

| ARRIMAHA WAX LAGA QABAN KARO WAXAA | KHAYRAADKA TAAGEERI KARA HIRGELINTA (ODOROSKA KHARASHKA QODOB KASTA GO'AAMINAYSA MAC-YADA UU KHUSEEYO) |
|---|---|
| Sii wanaajinta SIyaasadda/ Qaabdhismeedka Nidaamineed | • Miisaaniyadda qaranka, kaalmada horumarka iyo kaalmada farsamo |
| Fidinta iyo sii wanaajinta kaaayaasha ICT-ga | • Waaxda gaarka ah, PPP, kaalmada horumarka, miisaaniyadda qaranka, istiraatiijiyadda galaangalka dadka oo dhan. |
| Galaangalka iyo adeegsiga qaadweynta (Broadband access and use | • Miisaaniyadd qaranka, kaalmada horumarka iyo farsamo, waaxda gaarka ah, istiraatiijiyadda galaangalka dadka oo dhan |
| Maamulka Jeegaanta (Spectrum Management) | • Miisaaniyadda NCA |
| Ammaanka Internetka ( Cyper -Secuirty) | • Miisaaniyadda qaranka, kaalmada farsamo |
| Shaqaalaha (Human Resurces) | • Miisaaniyadda qaranka, kaalmada horumarka. |
| Hal-abuurka iyo Cilmi-baarista | • Miisaaniyadda qaranka, kaalmada horumarka iyo farsamo, waaxda gaarka ah. |
| Dhowrista Macmiilka | • Miisaaniyadda macmiilka, kaalmada horumarka iyo farsamo. |

# 8. LIFAAQ

## 8.1 EREY-BIXIN

### A

**KARAARIYE/DEDEJIYE (ACCELERATOR):** Goobo ama hay'ado loogu talogalay karaaritna ama dedejinta kobaca shirkada cusub ee suuqa. Adeegsadayaasha xarumahan/hal-abuurrada ganacsiga ee ku jira xarumaha waxaa laga caawiyaa qalabka ay u baahan yihiin inay suuqa soo geliyaan hal-abuurradooda.

**GARAAD GACMEED (ARTIFICIAL INTELLIGENCE):** Khawaarismiyaadka/ algorisamyada kombiyuutarka in loo adeegsado xallinta mushkiladaha iyo taageerista go'aan qaadashada, inta badan iyada oo la gorfaynayo data badan.

### B

**BAR-BILOW (BENCHMARKING):** Hannaanka socda ee lagu cabbirayo badeecadda, adeegyada iyo dhaqannada iyada oo laga qiyaas qaadanayo halbeegyada la aqoonsan yahay.
Blockchain: Nidaam kalsooni leh oo la baahiyahay oo ku salaysan silsilad/taxane mucaamalaad la af-sireeyay oo ku jira seerfarro (kombiyutarro) badan.

**WAKIILASHADA HANNAANKA GANACSIGA (BUSINESS PROCESS OUTSOURCING/ BPO):**
Mid ama in ka badan hannaanada IT-ga in loo wakiisho adeeg bixiye dibadeed.

**QAADWEYN ((BROADBAND):** Xiriir internet oo uu sarreeyo xawaarihiisu.

**BAAHIN (BROADCASTING):** Gudbinta muxtawaha codka iyo muuqaalka ah, oo laga gudbinayo il si ay u helaan dad badan oo daawadayaal/dhegaystayaal ah.

**GOOB-WADAAG (CO-LOCATION):** Goob ay dhowr shirkadood ku wadaagaan kaabayaasha sida taawarrada, tamarta, ilaalada, iyo dhulka, iwm, si ay uga helaan faa'idooyin loojistiko ama maaliyadeed.

**KOOXDA FALCELINTA DEGDEGGA AH EE KOMBIYUUTARKA (COMPUTER EMERGENCY:** Response Team /CERT) - **KOOXO XEEL:** Dheerayaal ah oo ka wada shaqeeya wax ka qabashada xaaladaha amniga kombiyuutarka.

**AFGARADKA DALKA HEERKA:** Sare ee Magaca Degelka (Country Code Top-Level domain /ccTLD) - Waa magac degel internet oo heer sare ah oo inta badan uu adeegsado ama loo gaar yeelay dal gaar ah.

**MIDOWGA/ISDHEXGALKA (CONVERGENCE):** Midowga tiknoolajiyaddu waa habka nidaamyada tiknoolajiyadda ee kala duwani ugu janjeeraan inay isugu biyo shubtaan kuwo qabta howlo isu eeg, sida in baahinta loo adeegsado xarkaha isgaarsiinta.

**CRYPTOCURRENCY/ LACAGTA QARSOON:**
Unug wax isweydaarsi faa'ido oo adeegsanaya lacag ku salaysan tiknoolajiyadaha blockchain.

**BAAHINTA DIGITAL KA AH (DIGITAL BROADCASTING):** Waa hannaanka adeegsiga xogta digitalka ah (1,0) halkii laga adeegsan lahaa qaab hireedka analoogga (analogue) si uu qaado baahinta marinnada telefishanka, ama liidadka rakaadka raadiyaha ee loo qoondeeyay.

**AQOONTA DIGITALKA AH (DIGITAL LITERACY):** Awoodda helitaanka, habaynta, fahanka, qiimeynta iyo gorfaynta xogta iyada oo la adeegsanayo tiknoolajiyadda digital ka ah.

**HOG/GOD (DUCT):** Marin laga dhiso dhulka hoostiisa ama dushiisa si uu qaado xarkaha isgaarsiinta sida fibre optica ama xarkaha taleefanka. Godadka kale waxaa loo adeegsan karaa qaadista xarkaha korontada, biyaha ama beebaka bullaacadaha.

## E

**BEERAHA ELEKTROONIGA AH (E-AGRICULTURE)**
ICT-ga in loo adeegsado sii wanaajinta dhaqannada iyo wax soosaarka beeraha.

**GANACSIGA ELEKTROONIGA AH (E-COMMERCE)**
Gudbinta faa'idada ee alaabta iyo/ama adeegyada iyada oo la adeegsanayo dhextaallada elektrooniga ah.

**WAXBARASHADA ELEKTROONIGA AH (E-EDUCATION)**
Tabobarrada ama barnaamijyada waxbarasho in lagu gudbiyo qalab elektrooni ah, waxa ay koobsanaysaa adeegsiga kombiyuutar ama qalab elktroonig ah si loo bixiyo agab waxbarasho.

**DOWLADDA ELEKTROONIGA AH (E-GOVERNMENT)**
Adeegsiga dowladda ee ICT-ga si ay ugu qaaddo maaraynta howlgalladeeda iyo bixinta adeega.

**CAAFIMAADKA ELEKTROONIGA AH (E-HEALTH)**
Adeegyada caafimaad in lagu bixiyo ama sare loo qaado iyada oo la adeegsanayo ICT-ga.

**WAX-DHIGASHADA ELEKTROONIGA AH (E-LEARNING)**
Wax dhigashada iyada oo la adeegsanayo dhextaal elektroonig ah,taas oo had iyo jeer ah internetka.

**QASHINKA ELEKTROONIGA AH (E-WASTE)**
Qashinka ka dhasha tuurista qalabka elektrooniga ah.

## F

**XARKO LA' OO SUGAN (FIXED WIRELESS)**
Adeegsiga qalab ama nidaamyo aan xarko lahayn si la isugu xiro laba goobood iyada oo la adeegsanayo raadiyow ama xiriir kale oo bilaa xarig ah.

## G

**NIDAAMKA CAALAMKA/IGA EE XIRIIRKA TALEEFANNADA GACANTA (GLOBAL SYSTEM FOR MOBILE COMMUNICATIONS/ GSM):**
Waa halbeeg ku salaysan shabakadaha xiriirka taleefannada gacanta/moobilka.

**HARDWARE/QALAB KOMBIYUUTAR:** Isku xirka, nidaamyada iyo qalabka jireed ee loo baahan yahay si loo kaydiyo loona hirgeliyo barnaamijyada software-ka.

**HOOY/ HOOY HAL-ABUUR (HUB/INNOVATION HUB)**
Goobo loogu talogalay inay koriyaan hanaqaadka mashaariicda tiknoolajiyadeed. Inta badan waa goobo la wadaago oo kharashka maamulka ay wadaagaan adeegsadayaashu ama maalgeliye uu ka taageero.

## I

### ABABIYE (INCUBATOR)

Ababiyayaashu waa goobo loogu talogalay in lagu dedejiyo korodhka shirkadaha cusub, marka si gaar ah laga hadlayo ICT, adeegsadayaasha goobahan waxaa la siiya xirfado dheeraad ah oo ay ku koriyaan fikradahooda.

### TIKNOOLAJIYADDA XOGTA IYO ISGAARSIINTA (INFORMATION AND COMMUNICATIONS TECHNOLOGY/ ICT)

Waa erey dallad ah oo koobsanaya qalab ama barnaamij xiriir oo kasta, oo ay soo hoosgalayaan raadiyaha, telefishanka, taleefannada gacanta, kombiyuutarka iyo qalabka iyo barnaamijyada shabakadaha, nidaamyada dayax-gacmeedka, iyo sida oo kale adeegyada iyo barnaamijyada kala duwan ee lala xriiriyo kuwaas ee laga helo galaangalka xogta.

### TIKNOOLAJIYADDA XOGTA IYO ISGAARSIINTA EE LOOGU TALOGALAY HORUMARKA (INFORMATION AND COMMUNICATIONS TECHNOLOGY FOR DEVELOPMENT/ ICT4D)

In tiknoolajiyadda xogta iyo xiriirka loo adeegsado taageerista barnaamijyada iyo farogelinnada bulsheed, dhaqaale, siyaasadeed, deegaaneed iyo barnaamijyada kale ee horumarineed ee la xiriira.

### BULSHO XOGEED (INFORMATION SOCIETY)

Waxa ay tilmaamaysaa bulshada casriga ah ee aqoonta u leh - sida toganna u adeegsata - xogta iyo tiknoolajiyadda xiriirka; Bulsho abuurista iyo isweydaarsiga xogtu uu yahay dhaqdhaqaaq bulsheed iyo ganacsi oo dhab ah.

### MIDOWGA ISGAARSIINTA CAALAMKA (INTERNATIONAL TELECOMMUNICATIONS UNION/ ITU)

Hay'adda Qarmaada MIdoobay ee mas'uulka ka ah isku-duwisa adeegsiga la wadaago ee jeegaanta caalamiga ah, taas oo dejisa halbeegyada caalamiga ah ee is-gaarsiinta iyo sida oo kale horumarka ICT-ga.

### BAR ISWEYDAARSI INTERNET (INTERNET EXCHANGE POINT /IXP)

Goob dhexe oo shabakaduhu isku weydaarsadaan dhaqdhaqaaqa. Inta badan waxaa maamula urur ay leeyihiin shirkadaha bixiya adeegga interentka, kuwaas oo sida oo kalena wadaagga adeegyada sida magacyada degellada.

### INTERNETKA WALXAHA (INTERNET OF THINGS/ IOT)

Adeegsiga qalabyada iyo agabyada leh internetka ku lagu sameeyay.

## K

### MAAMULKA AQOONTA (KNOWLEDGE MANAGEMENT)

Maaraynta toolmoon ee xogta iyo khayraadka dowladda iyo hay'adaha xiriirka la leh.

## L

### FURFURIDDA (LIBERALIZATION)

Debcinta nidaaminta Dowladda, ama heerka nidaamineed ee markii hore ad-adkaa. Waxaa laga helaa fursadda soo gelidda suuqa iyada oo shirkadaha siisa debecsanaan weyn oo ay ku maalgashadaan, howlahooda iyo adeegyadooda ku bedelaan, kuna saxaan ama ku gorgortamaan tacriifadaha.

### RUKHSAD (LICENSE)
Ogolaansho ay bixiso hay'ad nidaamineed si loo bixiyo adeegyada ICT-ga ama adeegsiga rakaadka jeegaanta raadiyaha.

### RUKHSAD HAYSTE (LICENSEE)
Cidda qaadanaysa rukhsadda ay bixinayso hay'adda nidaamineed, ee hoos imanaysa waajibaadka ay dhigayso rukhsaddu. assets, risks and rewards, to delivery a project/service/initiative of mutual benefit.

## O

### HELITAANKA FURAN (OPEN ACCESS)
Shabakad bixinaysa adeeg isgaarsiineed oo jumlad ah oo ay ku bixinayso qaab daah-furan oo ka maran faquuq.

## P

### ARDAA (PORTAL)
Degel internet oo laga helo adeegyo kala duwan iyada oo adeegsadaha loo gudbinayo marba qaybta uu doorto.

### SHIRKAD GAAR AH (PRIVATE OPERATOR)
Shirkad rukhsad u haysata nidaamyada isgaarsiinta oo bixisa adeegyada ICT-ga.

### SHURAAKO DOWLAD IYO GANACSI (PUBLIC PRIVATE PARTNERSHIP /PPP)
Waa habraac bahwadaag oo isu keenaya dowladda iyo ganacsiga gaarka ah iyagoo wadaagaya hantida, halisaha iyo faa'idada, si ay u fuliyaan mashruuc/adeeg/hindise faa'ido u wada ah.

## Q

### TAYADA ADEEGGA (QUALITY OF SERVICE)
Waxaa inta badan loo adeegsadaa in la tilmaamo cabbirka waxqabadka shabakad isgaarsiineeed iyada oo lagu dhererinayo halbeegyada caalamiga ah.

## R

### JEEGAANTA RAADIYAHA (RADIO SPECTRUM)
Eregyga jeegaan waxa uu tilmaamayaa noocyo kala duwan oo kaah birlab-danabeed ah oo leh hirbaacyo kala duwan. Jeegaanta ama hirarka hawadu waa rakaadyada raadiyaha ee ay ku safraan ishaarooyinka xiriirka oo idil. Rakaadaada raadiyaha waxaa loo adeegsadaa noocyo xiriir oo kala duwan sida isgaarsiinta dululaatiga (hawada sare), isgaarsiinta taleefannada gacanta, baahinta, maaxidda raadiyaha, adeegga dayax-gacmeedka gacanta, adeegyada dayax-gacmeedyada eeronootika (aeronautic), isgaarsiinta militariga, iwm. Rakaadka raadiyuhu waa khayraad dabiici ah, oo dhammaanaysa marka la adeegsado, oo lumaysa haddii aan si wax ku ool ah loo adeegsan.

Maamulka Jeegaanta Raadiyaha (Radio Spectrum Management) Waxa ay koobsanaysaa qoondaynta daaha furan ee caddaymaha ku slaaysan iyo la socoshada adeegsiga jeegaanta.

### NIDAAMIN (REGULATION)
Waxaa looga jeedaa sharciga ama wareegto ay soo saaray/meel mariso hay'adi.

### ROBOTICS
Mishiinada in loo adeegsado qabashada iskeed ah ee howlaha ay sida caadiga ah dadku qabtaan.

## S

### BARNAAMIJ (SOFTWARE)

Xidhmo barnaamijyo kombiyuutar iyo data-da la socota oo bixiya amarra kombiyuutarka u yeeriya waxa uu qabanayo, iyo sida uu u qabanayo si loo helo natiijo cayiman.

### ADEEG BIXIYE (SERVICE PROVIDER)

Qof ama hay'ad ogolaansho ama rukhsad u haysta dadweyanha in uu siiyo adeeg ICT, ama kaas oo leh ama mamaula shabakad ICT oo loo adeegsado in dadweynaha la siiyo adeeg.

## T

### ISGAARSIIN (TELECOMMUNICATION)

Gudbinta, bixinta ama qabashada xogta iyada oo la adeegsanayo xarig, raadiyow, ama qalab kale oo loogu talogalay xiriir birlab-danabeedka.

### ADEEG ISGAARSIIN (TELECOMMUNICATIONS SERVICE)

Bixinta adeegyada kaararka SIM ka ee gudbiya codka iyo data-da, iyo qalabka Hore loo bixiyay kharashkooda (Prepaid), ama nooc kasta oo gudbinta ishaarooyinka, ereyada, sawirada, ama war iyada oo la adeegsanayo shabakad isgaarsiineed, balse aan ahayan adeeg baahineed.

### DULULAATIGA CAD EE TV-GA (TV WHITE SPACE)

Isgaarsiinta raadiyaha ee adeegsanaysa rakaaddada jeegaanta baahinta ee aan la adeegsana, taas oo ku salaysan qalab garaadeed raadiyow iyo qoondaynta jeegaanta ee deenaamika ah ee wadaagista jeegaanta.

## U

### ADEEGGA GALAANGALKA GUUD (UNIVERSAL ACCESS SERVICE)

Waxaa looga jeedaa dhaqanka in adeegyo ICT oo heer bilow ah la siiyo qof kasta oo dalka deggan si loo kordhiyo galaangalka dadka ee adeegyada isgaarsiinta ee sarraysa sida ugu ballaaran ee suurtogalka ah, iyada oo adeegga la gaarsinayo dadka oo dhan iyada oo aan wax lagu kala faquuqayaa dadka haba yaraatee, kharash maangal ahna lagu siinayo adeeg ku filan.

### WAAJIBAADKA ADEEGGA EE GUUD (UNIVERSAL SERVICE OBLIGATION)

Waajib sharci oo qeexaya heerka ugu hooseeya ee helitaanka canaasirta adeegga ee u adeegaysa dadka oo dhan.

### SANDUUQA GALAANGALKA GUUD (UNIVERSAL ACCESS FUND /UAF)

Sanduuq loo sameeyay in uu fudaydiyo gaarista yoolasha siyaasadda qaranka ee adeeg guud iyo galaangal guud ee Tiknoolajiyadda Xogta iyo Xiriirka (ICT) ee deegaannada miyiga ah iyo kuwa aan helin adeegga ku filan.

## V

### VERY SMALL APERTURE TERMINAL (VSAT)

Xarun Dayax gacmeed aad u yar oo gudbisa, qabtana data-da, muuqaalka iyo codka iyaga oo adeegsanaysa dayax gacmeed adeegsanaya liidad rakaad oo kala duwan si ay sare ugu qaado gaarista adeegga internetka ee Soomaaliya.
Point

U

## 8.2 EREYADA LA SOO GAABIYAY

**AI:** Artificial Intelligence
**API:** Application Programming Interface
**ATU:** African Telecommunication Union

B

**BPO:** Business process outsourcing

C

**CERT:** Computer Emergency Readiness Team
**CIO:** Chief Information Officer

E

**EAC:** East African Community
**EACO:** East African Communications Organisation

G

**GB:** Gigabyte
**G2B:** Government to Business G2C- Government to Citizen
**G2G:** Government to Government
**GDP:** Gross Domestic Product
**GSM:** Global System of Mobile Communications
**GOVNET:** Government Wide Network
**GSMA:** Global Systems Mobile Association

I

**ICANN:** Internet Corporation for Assigned Names and Numbers
**ICT:** Information & Communications Technology
**IoT:** Internet of Things
**ISM:** Industrial, Scientific and Medical
**ISP:** Internet Service Providers IT - Information Technology
**ITU:** International Telecommunications Union IXP - Internet Exchange Point

L

**LDCS:** Least Developed Countries

M

**M2M:** Machine to Machine
**MAN:** Metro Area Network
**MB:** Megabyte
**MNOS:** Mobile Network Operator(s)

## N

**NCA:** National Communications Authority
**NDC:** National Data Center
**NEC:** National Elections Commission
**NREN:** National Research/Education Network

## P

**PPP:** Public Private Partnership(s)

## R

**ROW:** Rights-of-Way

## S

**SET:** Structure, Empower and Transform SDGs - Sustainable Development Goals

## T

**TV:** Television
**TVWS:** Televsion Whitespace

## U

**UN:** United Nations
**UPU:** Universal Postal Union
**USA:** Universal Service UAF - Universal Access Fund

## V

**VSAT:** Very Small Aperture Terminal

## CONTACT

**MINISTRY HEADQUARTERS**
JAMHURIA ROAD,  MOGADISHU - SOMALIA
Address: P.O. Box 66, Mogadishu - Somalia
Email: info@mptt.gov.so
Facebook: www.facebook.com/MPTTSomalia
Twitter: @MPTTSomalia